

WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE  
AKADEMIYAHA DHAQANKA

MAAHMAAHAA  
SADDEXSHUB

CARABI

INGIRIISI

SOOMAALI

W. Q. MAXAMED SHIRE MAXAMED

Muq.  
1974.

WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE  
AKADEMIYAHA DHAQANKA

MAAHMAAHAA  
SADDEXSHUB

CARABI

INGIRISI

SOOMAALI

W. Q. MAXAMED SHIRE MAXAMED

Muq.  
1974.

---

---

---

WAXAA LOO HADIYADEYNAYAA

DHALLINTA IYO DHALLAANKA SOOMAALIYEED

EE

SOO KORAYAA HA KU JID MAREEN

---

---

---

## A R A R

Af Soomaaligu wuxuu ku tilmaaman yahay af murti iyo xikmad qoto dheer leh. Odhaahdu iyo maahmaahdu afka waa ku badh. Dood hadday tahay, haasaawo, gar iyo hadaal kale oo la jeedinayo hadday tahay, maahmaahdu waa tii qeyb weyn afka ka qaadata.

Odhaahdu iyo Maahmaahdu, inkastoo, ay yihiin erayo xikmadeed, haddana, sifa ahaan waa kala duwan yihiin.

Odhaahdu waa eray tusaalegal ah, aanse, loo eegin higgaaddhaca midhaha, sida :

- a) Dani waa seeto.
- b) Dani kuuma been sheegto.

Maahmaahduse, odhaah xikmadeed ay ku fadhido ka sokow, midhaheedu ama ha gaabteen ama ha dheeraadeen e, xaraf higgayadeed bey ku dhisan tahay :-

- a) Samataliye sedkii waa janno.
- b) Hantiwadaag Hawl la'aan ma dhasho.
- t) Fadhi iyo Fuud yicibeed laysku waa (Halkan waa hamsada ka raw).
- j) Waxaad u baahan tahay ood weyday, waxaanad u baahneyn baa laga dhigaa.

Sida loo ogsoon yahay, wax kastoo nooli nafaqo ayuu u baahan yahay, afkana nafaqadiisu waa maahmaahda. Sidaa daraadeed, ayaa loo yidhi «hadal aan maahmaah lahayni waa soor aan dux lahayn oo kale».

Ruux waliba, maahmaahda iyo erayada kalee murtida ah, intuu uga baahdo ayuu ka gaadhaa, mar se. hadday maahmaahdu, afkeenna ku tahay shay lagama maarmaan ah, ruux kastaba, waxa ku habboon inuu ogaado falsafadda ku jirta odhaahda Soomaaliyeed sida ay u dhacdo.

Maahmaahaa Af Soomaaligu buuggan kuma dhamma, kumana dhammaan karaan, hase yeeshee, intaan ka qaatay waa intaan is-idhi, tusaale ahaan ayey afafka kale ula dhigmaan intuna, ulajeeddada buuggan oo kale laga leeyahay ku qumman.

Ruuxa buuggan akhristaa, wuxuu garan karaa in falsafadda ama fikradda Soomaalidu, mid ay afaf kale baro dheeraato ha joogtee, mid dambeysa aanaykolna ahayn.

Mid kale wax aan isku dayey maah-maah kastaba isda loo yidhi, oy u qoranto, taasoo, sida caadadu ay tahay wax yar ka duwan - la'aanteedna, la arkee, in ruuxu aannu erayga dhadhansan.

Waxa aan jeclahay in halkaan aan mahad qaaya leh uga celiyo Jaallayaashii hawshan gacan iiga geystay kuwaasoo ah Jaalle Shiikh Caaqib, Jaalle Axmed C. Qaalib, Jaalle Axmed Cartan Xange iyo oorideyda Khadiija Xaaji Maxamed oo si gaar ah hawsha iila qabatay. Mahad kalena waxaa iska leh qoraal lada buugta aan mararka qaarkood la tashi, u lahaa sida buugga maahmaaha guud ee Ingiriiska ee uu leeyahay Jaalle wilfred D. Bestee collins iyo abwaanka munjid ee Carabiga ah ee DAR AL MASHRIQ, Madbacadda Qaranka mahaddeedu, waa mid ay mutaysatay.

MAXAMED SHIRE MAXAMED.

MUQDISHO,

1974.

---

## HADAL WAA MERGI

Raggu waxa ay Haweenka ugu maahmaahaan :

«Dumar ama u samir ama ka samir»

Haweenkuna waxa ay Ragga ugu maahmaahaan :

«Inaan rag, hal uu kugu halo, iyo hal uu kaa heysto

labadaba leh».

---

---

---

# MURTI

---

---

(Murti hadal aan maahmaah lahayn waa micna la'aane,  
(Waa meydho geel oo dashoo naas mariil yahaye,  
(Waa xaajo marin heysatoo doqon mullaqaaye,  
(Waa gabadh lagu meheriyood muruq u weydaaye,  
(Waa mutane laga seexdoo muruggo heysaaye,  
(Waa maal agoon ruux cuniyo milil la quutaaye,  
(Maskaxdii caqliga weeye iyo lagama maarmaane,  
(Maqane iyo joogaba wixii midhaha Soomaali ah,  
(Maahmaahdu inay qaali tahay magane weydiiya.

A. C. Qaalib

(Alle ha u naxariistee)

---

---

# OGSOONOW

Xikmaddu waa baadi aqoonta ka maqan.

Hadal aan maahmaah lahayne,


Waa hilib aan mindi lahayn,

**ama**

Xeedho aan afaarnayn,

**ama**

Soor aan dux lahayn.





SOOMAALIDU WAXAY  
KU  
MAAH MAAHDAA

1. Abeeso farta loo taagey, fanaxey u boddey.

بعته ذراعاً ، فطلب باعاً

Give him an inch, and he will take an ell.

— Si kalena waa loo yidhaahaa : «doqon faras looga degay ha noqon»

Eraygu wuxuu u dhacayaa, haddii ruuxa sida uu rabo, loola kaco waa inuu wanaagga xejiyaa, waana inaanu damac qaadin oo aanu is-odhan kolba arrintu sidaad u doonto ha u dhacdo. Ogsoonow, «Timir lafbaa ku jirta»

2. Abeeso yaaney dhul u eki kugu dilin.

فلان يتلون كالحرباء

The devil is not so black as he is painted.

— Khatallaaddu midabyo kala duwan bey leedahay, ruuxa si weyn u feejigise, sida badan, waa kii nabad gala. Markuu leeyahay Faarax Nuur : «Booraan afkii laga qafilay qabarna hooseeyo. «Maanaa mindiyo lay qarshaa laygu qali doono».

3. Arrad waa dan, usgagse, waa doqonnimo.

النظافة من الايمان

Cleanliness is next to Godliness

— Waxa eraygan murtida ahi u dhacayaa, maal xumi waa kaa foofaa, moore xumisie, kaama foofto.

4. Af been u bartay wuu u bahal yoobaa.

الطبع يغلب التطبع

Liars should have memories.

- Haddii ruux, beenta lagu barto, inkastoo uu runta mar-mar isku dayo, haddana, lama rumeysto - waayo - dee waa tii la yidhi. «hadduu ruux seexduu soo tooso waa kii uun»

5. Aqoondarro laga roon.

الناس أعداء لما جهلوا

Ignorance is an evil.

- Aqoondarro, belaayo ka weyni ma jirto.  
Aqoon la'aani ruux kastoo weyn carruurnimo ayey u celisaa kan yarna, doqon oo kale ayey ka yeeshaa,

6. Aqoon la'aani waa iftiin la'aan.

العلم نور والجهل ظلام

Where ignorance is a bliss, tis folly to be wise.

- Jahligu indho la'aan uu keeno ka sokow, wuxuu ka dhiigan yahay gaadiid garbabeela oo indha la'aan awgeed aan meelna ku gaadhsiiin karin, jarna kaa duwi karin.

7. Aqoontu iftiinka miyaa !!!!!

العلم مصباح الحياة

Knowledge is Power !!!!!

- Aqoontu nolosha dhabta ah ayay dhalisaa, noloshuna, sideedaba, «nolol» waxa ay ku noqotay wada noolaanta meel lagu wada noolaan karo.  
Aqoontuna nolosha iftiin bey u tahay.

8. Aqooni arag kama horreyso.

ليس الخبر كالمعاينة

Seeing is believing.

— Waana sida loo yidhaaho :  
Sheegsheeg shahid baa karoon inkastoo ay run tahay in wixii la sheegsheegoba ay wax ka jiraan, haddana, hubaashada waxyaalaha muhim ah loo habsadaa si gun laga gaadho ayaa la mid noqota waxyaalihii aad indhaha ku dhigtay oo kale.

9. Aqooni waa indhanuggood.

العقل من اتعظ بغيره

Knowledge is understandaing.

— Ama sida kale loo yidhaahaa  
«Waa indha ku garasho. Ruuxa kaskii dhan yahay; si fudud ayuu wax u dareemaa, ilbiliqna ha ahaatee

10. Alif kuu hagaagaa, Albaqruu ku gaadhsiiyaa.

حسن التدبير نصف المعيشة

A good beginning is half the battle.

— Waxyaalaha qorsheyntu iyo bilowgu u hagaagaa, guul iyo waxtar bey la yimaadaan, haddii kalase, natiijad fiican lagama gaadho, sida Alif kaa xumaadey, ay Albaqra diisu ku dhibto.

11. Alla wateen wehel ma doono.

الله في عون العبد ، ما دام العبد في عون أخيه

God helps, those who help themselves.

— Ulajeeddadu waxa ay tahay in dadka isu gargaara ee Ebbena istaageerkooda la kaashada, in sida xadiiskuba uu sheegay uu Eebbe u gargaro.

12. All (oon) waa'ga waraabe cunin.

وأن غدا لناظره قريب

Tomorrow is another day.

- Waxa ay ka dhigan tahay, «ballan habeennimo, kaakac arooryuu leeyahay». Waa arrin laysla og yahay oo muldadeedii soo dhawaatay si ay u dhacdaba — oo aan u baahnayn sii wadwadid iyo hadal dambe.

13. Awrka dambe, awrka hore socodkiisuu leeeeyahay.

الفضل للمبتدى وان أحسن المقتدى

Between the leader and the led.

- Mawlac la dhiso oo lagu cibaadeysto ha ahaato, ama heshiis dad dhexdood laga sameeyay ha ahaato, ama siyaasad meel mar ah oo la jeediyay ha noqoto, arrin kastaba ruuxii ama kooxdii bilowday ayaa hadiyo jeer ku tilmaaman.

14. Ayaanlle' waa eedeysan yahay.

كل محظوظ محسود

Fortune favours fools.

- Dadku, inkastuu kala dedaal badan yahay haddana, waa kala ayaan roon yahay. Labadaba, kolka ay jooqtana, ruuxii garanayaa waa garanayaaye, dadaal waxaad ku mihiibi weydo, dadaal la'aan kuma hanatid.

15. Ismoog dhuuggii bey asleysaa ! ! ! !

سبيل به وهو لا يدري

None so deaf as those who will not hear.

- Waa sidii laxdii dhukaneyd : «Lax dhukani, col iyo abaarba moog».

16. Ishii aragtey burur.

عين رأّت فذرفت •

Out of sight out of mind.

- Waxa aad ku halqabsataa ruuxa ama sheyga aad dabadiisa soo qaban weydaa ee doondoondiisa, aad dhibaato kala kulanto.

17. Ninba waa kol e, mus ma kula koray!

كما تدين تدان •

Tit for tat (is fair play)

- Laba ruux oo kaftankii iyo haasaawihii si hufan u kala ritay waa kala joogaan.

18. Il ibtileysan yaa belaayo tilmaamta.

ولكن عين السخط تبدى المساويا

Those who only seek for faults find nothing else.

- Kolka ruux uu caado ka yeesho inuu arrin kastaba dhinaca xumaanta maahee, dhinaca fiican ka arki waayo, oo ishuu xumaan oo keliya hadiyo jeer ey tilmaanto ayaa maah maahdan oo kale loogu hal qabsadaa. Waxaa kaloo la yidhaahdaa, «Dhidar xabaalo qoodaa, qudhun buu uga dhacaa».

19. Ilko wadajir bey wax ku gooyaan.

الاتحاد قوة

Union is strength.

- Wadajirka istaageeridda, iskaashiga intaba, waa nolosha nololi nolol ku noqotaa - shariicadduna, si weyn bey inoo fartay in lala jiro wadajirka lagu dhaqmo : Waxaa kaloo la yidhaahaa, «Ilko abeeso hoos bey ka xidhaadhaan. Waana sida kale ee loo yidhi: «Istaageerid-day laba gacmood tamar ku yeeshaan e, haddaan bidixda, midigtu tiirinayn tahar ma goyseen.»

20. Intaad qayleysey anna waan qaybinaayey.

جمل يأكل وجمل يأكل العصار

One is catching the fish and another eating the fish.

- Ruuxa aan digniin iyo feejigaad arrimaha culus ku qabanin, hawshuu markaa ku jiro waxbaa laga dareemi karaa, kaddibna waa laga hortegi karaa. In Allaale intuu arrimaha ceynkaas ah ku faallajirey ayaa dad kalena ka hortegga ku camaljirey. Waana tab e tabtaa kale ma lagu baray ayaa weliba u raacda.

21. Intaanad falin ka fiirso.

من نظر في العواقب سلم من النوائب

Look before you leap.

- Wax aad si hubaal ah u tidhi iyo wax aanad u odhani, kala roon - wax aad hubaal ugu kaedo iyo waxaad mar keliya ku hambaabartona kala roon - si le'eg, waxaad fiiro ku qabato iyo waxa fiiro la'aan kaaga tagaana. kala roon. Arrintaad fiiro u yeelato, guul fiican ayaad ka gaadhaa. tan kalese, waad isku qoommadaysaa. Waana tan la yidhaahdo «hubsiiimo hal baa siistaa».

22. Iimaan waa uur muggii.

البطنة رأس الحمية

Enough is as good as a feast.

- Soomaalidu tilmaanta iimaanqabka qeyb bay ugu xeel dheertahay, waana, mid rag iyo haween, yar iyo weynba laga siman yahay. Sidaa daraadeed, ayaa midhaha laga sheegay ay u badan yihiin: «Waxaad iimaansataaba waa wixii kale, si le'eg «wixii ku deeqaba kugu filan».

Maal yar iimaankaa lagu kabaa.

Mid kalena ogow, ruux aan ii maanqabe ahayni Waa ruux aan diin qabin.

23. Oodi ab ka dhow.

رب أخ لم تلده أمك

Nearest is dearest.

- Kolba dadka intii is-afgarataa ama si wanaag ah isugu soo dhawaataa, ayaa nolosha iyo aadaminimada is ah sida beelaha meel wada yaal ee iskaashi iyo walaaltooyaba ugu dhaqan.

24. Oodo dhacmeed sidey u kala sarreeyaan baa loo kala gu raa.

ان الامور بحكمه وقياس

First come, first served.

- Hadalku siduu u kala horreeyaa loo kala saaraa arrimahana, si le'eg ayaa loo kala guraa. sidaa daraadeed, ayaa loo yidhaahaa. hadalaa i dheh uun maahee, waa i dhegeysana».

25. Oodi qaadis iyo jiidis weysla guryo geyr

ساعد أخاك ظالما أو مظلوما .

The receiver is as bad as the thief.

- Waa xaajadii laba ruux isla soo qaadeen oo laba siwood oo kala duwan oo labada ruux ay soo jeediyeen ay labadaba ku dhammaan karto. Geestii loo qaadaaba waa geestii kale.

26. Ijiid aan ku jiido waa gacmodaalis.

أنت تتفق وأنا متفق فكيف تتفق :

A dog does not eat a dog.

- Hadal maanta oo dhan ruuxba si u odhauaayo, go'aan dhacana laga fiigaayo gun iyo sal midna lagama gaadho taas oo kale waa sida xadhig ay laba ruux kala jiidanay so oo kale.



27. Iskaashinimo waa hawsha hantiwadaag.

الشركة من الاشتراكية :

Share and share alike.

- Mabda`u waa bulshe shaqaale oo loo siman yahay si taacab buura ah oo loo siman yahay loo helo, sida .u gabayaa giiba uu u yidhi. «Hantida iyo hawshabawadaag hadafku weeyaane».

28. Uli waa qabawdaa, eray xumise ma qaboobo.

رب كلمة سلبت نعمة .

A soft answer turns away wrath.

- Laba ruux haddii uu qoonsimaad dhex maro oo qoonsi-maadka ay isku farasaaraan mar uun bey ku kala bog-sadaan laakiin, waxa aan dhakhso looga kala bogsan waa erayga qallafsan ama gefka ah ee bulshana saameyn kara-kaasoo aan eehiisa dhakhso looga qaboobin. Sidaa aaw-geed, ayaa anshaxu ama asluubta qummani ay dadka iyo ubadkaba fartaa in aflagaaddada iyo waxa kale ee «fidmad» iyo xumaanta keeni karaa ay waajib tahay in carrabka iyo qalbigaba laga ilaasho, lagana digtoonaado. Dadku ba-badanaaba, iskuma raaco hunguri iyo dhuuniga kale. laakiin waxaa laysku raacaa, layskuna afgartaa, hadalka wanaagsan iyo dabciga (af iyo adinba) hufan ee macaan.

29. Uurkiisiyo afkiisu isma laha

ما كل موسى الحديث بصادق .

Saying is one thing and doing another.

- Waa ruuxa la yidhaahaa waa uur adag yahay ee aan erayguu yidhaahdo sida badan aan aamin laga qabin. Ruuxa caynkaas oo kale u baxay waa kan lagu naanay-saa inuu yahay xadhig lama sitaa».

30. Barasho horteed ha i nicin.

• ان حلاوة الكعك الجيد يتضح عند طعمه

The proof of the pudding is in the eating.

— Ruux aanad markaa aqoon, adoo barta mooyee, inaad kolkiiba wax ka sheegtaa ma qummana.

31. Barasho yari waa bil saddexaad.

• العلم بالشيء ولا الجهل به

Little knowledge is dangerous.

— Sida bil saddexaad ey beeshaadana kaa kaxeeyso, beela kalena aaney ku gaadhsiin, ayaa aqoonta yarina tahay. Kol haddaan aqoonta laga maarmayn, ruux kasta, yar iyo weynba waxa la gudboon, haatan, inuu aqoonta iyo waxbarashadaba uu kordhisado. Sida hawlahaha noloshuba ay intaa u kordheeyso.

32. Baqtiwareen waa xaaraan.

• الطعن في الميت حرام

Speak only good about the dead.

— Sida badan, qof geeriyooday xumaan hadduu lahaan jireyna laguma soo qaado, dhinaca wanaagga ayaa sida badan laga xusaa sida inta badan caadaduba ay tahay.

33. Ballandarro waa diindarro.

• لادين لمن لاعهد له

A man without promise is a man without faith.

— Ballanqaadku (oofinta iyo xejintuba) qaayaha uu leeyahay waxaad ka garan kartaa odhaahda Soomaalida ka sokow, sida diinta Islaamku ay ugu xeeldheeraatay.

34. Ballan habeennimo kaakac arooryuu leeyahay

كلام الليل يمحوه النهار

Morning sun never lasts the day.

- Ballanta oo la ocfiyaa waxa ay ka mid tahay sifaha iyo tilmaamaha fiican ee lagu dhaqmi karo - diintuna si weyn ayey u tilmaantay, bulshada Soomaaliyeedna si caafimaad qabta ayay ugu barbaartay. Ruuxa andaqaada in xilka uu mujtamaca u hayo guto waa ballan uu andaqaaday, kii ka soo baxaana xilkii ayuu gutay, kii ka soo bixi waayeyna ballantii ayuu buriyay.

35. Berberi wax faraa lagu qaato ka weyn.

ولابد من صنعاء وان طال السفر :

Rome was not built on a day.

Sebenkii Ingiriisku uu dalka intiisa waqooyi uu heystay ayaa mar niman odayaal ah lagu yidhi, «Ingiriis rag ayuu hoos ahaan shir siyaasadda ku saabsan ula qaatay. Magaalada xukunkeeda waxa laga yeelayana way isku afgarteen, ka dibna, nimankii sida la yidhi Ingiriiskii lacag buu siiyey. Oday shirkii ka mid ahaa, ayaa kacay, intuu boodhka iska tumay ayuu sidii cadhana u yidhi.

«Waar, Berberi, wax faraa lagu qaato ka weyn. Sidaa ayaa eraygu uu maahmaah u noqday, waxaana la mid ah odhaahda kalee ah : «deg, dheelalo laguma cuno. Benderna, maalin keliya lama bulbalo.

36. Belaayo ka hortag mooyee, ka dabatag ma leh.

دع العوراء تخطئك .

Don't cry out before you are hurt.

- Dee waa run oo waana tan la yidhaaho,  
«belaayo ha u yeedhan, kuumaba timaaddee».

37. Belaayo kaa sii jeedaa, lays kuma soo jeedsho.

الفئة نائمة . لعن الله من أيقظها.

Never trouble, till trouble troubles you.

— Adoo ogsoon, belaayo, intey kaa maqan tahay iney eid kale ku soogan tahay, in Alaalle, intii laga fogaan karo ayaa fiican in laga fogaado. Belaayey maxaad tahay! «wixii mujtamac urursani uu shareysto». ayey tidhi.

38. Belaayo, salgan baa ka horreeya.

أرى بلحاظ الرأي ما هو واقع

Coming events cast their shadow.

— Salgan oo sadaal ama sanan ahi waa sida ufada roobka ka soo horreysa oo kale. Dadka badxigeenka ahina waxa ay yidhaan oo kale «hoonbaro libaax bey soo waddaa».

39. Belaayo waa tii kaa qoslisa.

وشر البلية ما يضحك

That which is evil is soon learnt.

— Marka ay yaab oo kale tahayna, waxaa la yidhaahaa - waar belaayo gawso waaweynaa.

40. Belaayo intey kaa maqan tahay, qeyrkaa bey ku maqan tahay.

مصائب قوم عند قوم فوائد

One man's meat is another man's poison.

41. Beenaale markhaatigiisuu fogeeyaa.

كل كذاب أشير

Show me a liar and I will show you a thief.

— Maahmaahdaan oo kale waxa aad soo xigataa, kolkaa aad wax cad cid kale aad la hortimaadid oo aad kula doodid.

42. Bil saddexaad, beeshana waa kaa kaxeysaa, beela kalena kuma qaadhsiiso.
- ما كل لماع براق ذهب
- All that glitters is not gold.
- Waa shay bilic kula yeeshay oo kolka qeyb loogu fiirsado aanad ku diirsan shaygaa bilicdiisa, waa waxa bilicdiisu aanay sii ridnayn — waa arrinta ama erayga aan iskuhallayn lahayn.
43. Biyo meel godan bey isugu tagaan.
- خير الكلام ما قل ودل
- Brevity is the soul of wit.
- Hadal inuu socdaba meel uun baa ujeeddadiisu u dhacdaa — kolkuu saldhigana gun baa laga gaadhaa.
44. Bohol hadimo ha qodin, haddaad qoddidna ha dheerayn, ku dhici doontee mooyee.
- من حفر حفرة لآخيه وقع فيها
- He that entraps his friends, falls in first.
- Maahmaah ka sokow, erayggu waa xaddiis qudsi ah. Xikmad iyo xadiis ahaanba, ruuxa qumman waxa looga digayaa inaanu marna isku deyin wax dibindaabyo ama wax hadimo ah oo uu ruux kale oo walaalkiis ah uu u geysto — sida aanu isba u jecleyn, in wax dhibaato ku sugan tahay loo geysto.
45. Talo adaa ku nool e, iyadu kuguma noola.
- لاندم من استشار
- Advice when most needed is least needed.
- Talada qummani waa shay qaaliya, Waxaase, ka qiima weyn ruuxa talada kuugu deeqa, sidaabaana loo yidhaahaa. «nin kula taliyey kuuma hanbeyn». Ogowna, waa tii hore loo yidhi : Raggi waa saddex : ma tashe, ma tashii-she, iyo ma tashade.

46. Talo isuma kaa sheegto.

• تأتي الرياح بما لا يشتهي السفن

You can not trust the chance.

— Horena waa tii loo yidhi «talo adaa ku noole, iyadu kuguma noola».

47. Tigaadi daw kama baxsana.

كل اناء بما فيه ينضح

An empty bag will not stand up right.

— Waana sida kale ee aynu u nidhaahno, «weel waliba wixii ku jiruu dhididaa». Si kale, qofka araggiisu, qaayi-hiisa kama baxsana.

48. Tuhun waa sed.

سوء الظن من شدة الضيق

Suspicion is the bare of friendship.

— Kan sedka ahi, waa kan aan tuhunka qaarkii ahayn. ruuxa iimaanka qabaa wuxuu u muuqdaa sidii ruux iska ladan, sidaa aawgeed, ayaa dadkuna u qaataa inuu yahay ruux iska ladan, isna tuhunka ayuu iska huwanaadaa, waxaaba dhici karta in ruuxaasu haddu cid kale amaah ka doono in tuhunka awgii, wuxuu doonaba uu ku helo.

49. Jaallahaa jaallahii waa jaallahaa.

صديق صدوق صادق الوعد منصفا

Your enemy's enemy is your friend.

— Waxaa kaloo la yidhaahaa, Jaallahaa cadowgiina waa cadowgaa.

50. Jaallahaa kuma jebiyo.

• يعرف الصديق عند الشدة .

A friend in need is a friend indeed.

- Jaallahaaga dhab ahi waa kii aad iskuhallayn kartaa, waa ruuxa uurkiisu iyo carrabkiisu kula jiraan, haddii kale, waa kan odhaahda kale ay ku timid «kolka hawli soo ekaato ayaa hayeeye hoosta ka dusaa».

51. Xaqa lama duudsiyo.

• لا يخشى في الحق لومة لائم .

Do what is right, right is might.

- Sida kale loo yidhaahaa waa :

«Xaqa lagama dhagar galo loomana aabbe yeelo». Bulshada Hantiwadaaggana saldhiggeedu waa caddaalad laga siman yahay, loona siman yahay.

52. Xaajo nimaan ogeyni, indhuhuu ka ridaa.

• جعل الزج قدام السنان .

To put the cart before the horse.

- Maahmaahdaas oo kale, saddex shub ayey u dhaceysaa.

53. Xaajo aan la rogrogin rag baan helin.

• الحديث ذو شجون .

Every why has a wherefore.

- Eraygu rag iyo haweenba waa kulminayaa. Arrinta u baahata in culeys wax lagaga qabto waa tan doonta fiiro, hindise iyo dhinacyo laga eego, haddaan xaajo loo miyirin oo kolba dhinac loo rogin, waa tii kaa guracanta ama kaa fakata.

54. Xeydha jecli, beerka jecli kala daa.

• تقرأ اية وتنسى اية

You cant eat your cake and have it.

- Waa bog iyo baabaco oo waxa u dhexeeyaa waa jirjir.

55. Xikmadu waa baadi ruuxa muuminka ka maqan.

الحكمة ضالة المؤمن .

Wisdom is the wish of the wise.

— Waa kaa maqantoo ruux kale carrabkii ayaad ka hee-shaa.

waa kaa maqantoo la'aanteed gartaadu kuma raacdo

56. Xikmadi ruux waallanna kama maqna.

خذ الحكمة ولو من افواه الجانين

A fool may some times give a wise man counsel.

— Ruuxa aan si aada isu dhaafsaneyn weeye ruuxa la til-maamayaa. Hadallada dhacdhaca ah ee ruuxa si hawl yari ah looga helaa, ayaa macne weyn ama arrin weyn oo meelmar ah looga qaataa. Waa sida loo leeyahay xik-madu ruux waallanna kama maqna.

57. Xikmad la'aan caqligu wuu xaalufaa.

الحكمة غذاء القلوب .

Manners maketh man, wisdom great men.

Xikmaddu waxa ay ku dheehan tahay murtida iyo maa-hmaahda, falsafadda iyo culuunta kale ee ay suugaantu ka mid tahay. Had iyo jeer caqligu kuma jeedi karo haw-lo culus oo mar kastaba cilmiyayn u baahan — waxa na-sasho iyo nuxurayn intaba u ah murtida iyo inta la oro-orta si uu ruuxu u noqdo ruux miisaan leh, caqligiisuna uu noqdo mid qeyb u deggan, waana sidaa, sida kalee loo yidhi, «xikmad la'aan caqligu wuu caabuqaa».

58. Khaayin afkuu kugu dhunkado, yuu kugu qaniinaa.

كالعقرب يلدغ ويصىء

Like a serpent that bites and squeaks.

— Maxaa khaayinka sidaa ugu wacan. Dee uurkiisa iyo afkiisaan isla hayn. Waa sida mindi labada dhinacba ka afeysan, oo gees kastaba aad wax ugu goyn kartid.



59. Dabkii baxayaa dab lagu qabsadaa.

ألق دلوک فی الدلاء .

Go with the tide.

- Waana tan la yidhaahaa, carradaad joogto ayaa camal-keeda la yeeshaa — dabeysii cusub ee dhabatana waa lala jiraa iyo kolba maayaha taagan. Geeddiga mujta-macana lagama hadho, lamana hakrado, yaanad «ha-dhaa» noqone.

60. Dad, dad baa loogu gabbadaa, dugaagna geed.

عدوک من صدیقک مستفاد .

Don't tell your friend what the enemy wants to know.

- Kolka ay heer kore joogto, «cadawgu» si uu kuugu soo dhuunto ma waayo. Asal ahaanna, saaxiib kastaba ma noqon karo mid laysku hallayn karo waxa u nadiir ah waxa la yidhaahaa «cadowgaana kol ka digtoonow. saaxiibkaana kun jeer», Mid kalena ninkii gabyayna wuxuu yidhi : Xabiib nimaan kuu ahayn xaraf kasta haw jeedin.

61. Dad, waa nin abaal gutiyo, nin loo abaal guda.

هل جزاء الاحسان الا الاحسان .

People are rewarded by deeds rather than by words.

62. Dadku waw daawe saddexda duunyagal (dabka, daaqa daangelisga)

الناس شركاء في ثلاث « الماء ، المرعى ، النار »

Share and share alike.

- Waa xaddiis qudsiya oo tilmaamaya mabda'a Hantiwa-daagga inuu caddaalad dadka ka simo. Arrimaha ku saabsan maamulka danaha lagama maarmaanka ah ee dadweynaha (TA'MIIN) halka loo cuskanayaa waa si-dan murti-xaddiisku ay jeedineyso.

63. Dawaco meeshay macal ku dhadhamiso yey macaluul ugu bakhtidaa. «dhimataa»

أن تحسب الشحم فمن شحمه ورم

Every day is not sunday.

- Waa sida loo yidhaahaa «marti badan iyo baryo badan-ba waa leysku nacaa».

64. Dagaal waa gelin dambe.

أول الغزو أخرق

War is won on tactis.

- Hawshii ku hortaalba waa dagaal ku sugaya oo kale. Haddii hawshu mar iyo lababa kuu toosi weydyo, sida loo yidhi waa gelin dambe waxa ay tahay, kolkaad kolba u nasato oo gacanta aad ka dhigi weydo, iyadaa dan uu toosi. Sida badanna, waaya-aragnimadu waxa ay ku timaaddaa fara ku heynta tan iyo inta waxyaalaha aad faraha ku heysay ka curtaan, kaddibna, ku meel maraan.

65. Damal walba in gubta waa hoostaal.

من كان لك كله - كان عليك كله

Every one thinks his own burden the heaviest.

- Mujtamac kasta oo aadamigu uu ku nool yahay kolka aad fiirisid waxa aad arki kartaa in fardi kasta iyo koox kasta iyo raabo kastaaba hawl gaar ah ay hayaan dadkuna, hawshaasi (ha yaraato hase weynaatee), la'aanteed dhibaato ayey noloshu u leedahay — sidaa awgeed, ayaa ruux kasta oo koox ka tirsani ama koox kasta oo raabo ka tirsani isu biddaa in ay hawsha intocda culusi iyaga dul qotonto. Mujtamaca, dhismihiisu wuxuu isu gashan yahay sida dhismaha sarta qotonta oo qaarba qaarka kale uu heysto, waa dhinacee dhinaca uu culeysku u badan yahay?

66. Dameeri dhaan raacdey.

• يهب مع كل ريح

Quick believers need broad shoulders.

- Waa hayeeye ama hal jilicsane. Waa ruux fiiro la'aan wax kastoo uu maqlo ama arkaba iska rumeysta. Waa ruuxa loo yaqaan «hiinraac». Tilmaantana ruuxa la yimaaddaa waa mid uu ku canbaareysan yahay..

67. Dameertu geela ha didisee, bururuf bey sii leedahay.

أحسفا وسوء كيله

His bark is worse than his bite.

- Nin ragi waxa loo seeto dheereeyoba, goor ay noqotaba mar uun ayuu si aada isu dabraa oo isku jiidaa dabar aan ka furmin. Waana sida kalee loo yidhaahdaa. «Geelow geed kastaba daaq markaad ciin daaqdaase, lagu yaabaa», Waa run markaad geelow ciin daaqdo yaa gandoodso.

Weliba ninka baabuurka wadaa si halis ah, ha ii sigree. haddana, waa i canaanayaa, iguna qeylinayaa. «Waxaasu saw wax lala yaabo ma aha», ayuu odegii si weyn uu baabuurka ka daba yimid uga nixiyay uu u yidhi, isagoo cadheysan. Kanixid iyo cannaani odeyga ma wada qabato.

68. Dantaa lagumana dheelo, lagamana dheeraado.

• العيش نجهه

Do not quarrel with your bread and butter.

- Waayo «dani waa seeto». Ruuxa dantiis garan waayaa dano dad kalena ma garto. Ruuxa hawshiisa ka adkaan waayaa ama dhalliilaaba, dan kale ayey ku qasabtaa in uu u gaadiido, dadnimadiisana taasuu mid u dan ah ma aha.

69. Dani kuuma been sheegto.

الحاجة تنفق الحيلة .

Necessity has no law.

- Waxaa kaloo la yidhaahaa, «waxaad u baahato way kuu beermaan»; Laakiin, ha u qaadan. adoo meel iska kuu-duda oo aan u hawshoon in waxaad habaney sid aad hawl yari u hesho.

70. Dani waa seeto.

الحاجة أم الاختراع

Necessity is the mother of invention.

- Sida ay ruux kastaba ugu kala muuqato waxa wanaagsani iyo waxa xumi ayaa ruux kastaba dantiisa, tan dadweynaha, tan dalka, intaba uu u garanayaa, isna dhaafin karin, moogi karin kana doodi karin waana sida ka-lee loo yidhi, «dan iyo madaxaaga toona lagama boodo»;

71. Daad la'aan doox ma soo rogmado.

وجعلنا لكل شيء سبباً

There is no cause without reason.

- Xikmad iyo aqoon baa ku jirta ogaanshaha la ogsoonaa-du in wixii dhacaa ay sabab iyo ula jeeddo ku dhacaan, wixii hakadaa ama suuragal noqon waayaana si le'eg in sabab ay la hakadeen ayaa iyana meesha ku jirta.

72. Daad intaanu ku soo gaadhin baa leyska moosaa.

ان دواء الشق أن يخرجه

To prepare is half victory.

- Arrini inta ay wax ka qabasho leedahay ayaa wax laga qabtaa, kol hadday kaa fakato, waa adag tahay sidaad wax uga qabato, sida ay ku habboon tahay in guriga leyska mooso intaan daad qulqulayaa ku soo xuluullan waa sida loo yidhi.

73. Degdeg laga roon.

العجلة من الشيطان

More haste, less speed.

- Waa tan gabadhii ciyaarta ku jirtey ee ninku ugu heesay (markey degdeg u soo boodi weyday, ay heestii ugu celisey) «Degdeg u soo bood baad tidhi, dib haddaan u fiirshay, dan baanan bidin.»

74. Deyro hore, deeq kama dhacdo.

خير البر عاجله .

He gives twice, who gives, quickly.

75. Dib u dhacaa qoonsimaad buu leeyahay.

البركة في البكور .

Delaying is dangerous.

- Waxa kalee la yidhaahaa, kolka cagajiid ay «hawshu dareento»

Dib u dhige dhibaatu la kulmaa.

لا تؤخر عمل اليوم للغد .

Dib u gurashona, dib bey kuu dhigtaa.

ان من لايتقدم يتقهقر :

76. Diqsi biyo ku dabbaal bartay, fuud buu ku gubtaa.

هو في البر عوام

Flies are easier caught with honey than with vinegar.

Waa sidii wiilkii dibugurashada yiqiin uu aabihii ugu baaqay: Aabbe «kan yar iga celiyoo kan weyn igu soo daa».

77. Diiday hore kuma xishee, yay diiday dambe ku xillin.

ومن قال لا نقد أجاب

He is no man who can say «NO».

- «Haa iyo maya» waa laba eray oo cad laakiin, kolka aanad ruuxa midna ka garan ayay dhibaato tahay. «He-yey iyo Yehey» midna, warkii ma cadda. Waana sida loo yidhaahda, «biseyl iyo ceedhiin wixii u dhexeeyaa waa yacyacood.»

78. Doqon ka hadli isagaa isdiliye.

مقتل الرجل بين فكيه

Give a fool rope enough, and he will bang himself.

— Waa tan kalee la yidhaaho af baa billaawe bixiyay.  
Maahmaahdani waa saddex shub.

79. Doqonnimo daawo ma leh.

والحمق داء ما له دواء :

Give a fool a rape enough, and he will bang himself.

— Waxaana kaloo la yidhaahaa. «Doqoni, xadhkaha lagu xidhi, xusuladay ku sidataa». Ninkii gabyayna wuxuu yidhi : «Doqon baa halkii lagu qatali qoorta soo dhigane. Doqon baa halkii dabin u yaal daadsan weligeed».

80. Dudumo dheeraataa dhulkay ku soo noqotaa.

الرجوع الى الحق فضيلة

Truth will conquer.

— Wixii heerkiisa dhaafaaba, intiisii hore ayuu ku soo noqdaa maahmaahduna, dhinac waxa ay kala jirtaa «cilmi-ga seyniska» Geedka gunta laga koro ee baarka looga baxo, xaggee baa loo dhaafaa ! ! ! !

81. Dundumooyinkoo lala hadlaa damac ma yeeshaan.

ولكن لاحياة لمن تنادى

Dead men tell no tales.

— Ruux aan geeri iyo nolol midna ahayni kama duwana dundumo haba dheeraatee, aan ku maqlayn, kuuna ja-waabeyn inkastood. la hadasho. Waxaa quus laga joo-gaana waa sidaa oo kale.

82. Raqba waa ku raggeeda.

لكل دهر رجال .

To make one hole to stop another.

- Iyadoo la ogsoon yahay in shay kastaba sanco ahaan uu leeyahay shaygii u sameysnaa sida cudur kastaaba uu u leeyahay daawo u gaar ah. ayaa haddana. murtidu ay tilmaameysaa in hawl kastaba iyo xaajo waliba ay leedahay dad u gooni ah oo cilmi iyo aqoonba loo biday.

83. Ruux aan sal lahaynin sedkii laallan.

أحول من أبى براقتش

Jack of all trade and master of none.

- Waa ruux aan la aqoon si loogu soo hagaago, aqoon ha noqoto ama mabda'a iyo waxyaalo kale oo la mid ah e.

84. Ruux aan geeri iyo nolol midna ahayn.

لا في العير ولا في النفير .

He goes with the ebb and rise with the tide.

Waa ruux liid la bido oo aan rajona laga sugeyn, quusna weli laga joogin ayaa loogu maahmaahaa. waa kan eraygu uu ku yimid «dundumooyinkoo lala hadlaa damac ma yeeshaane».

85. Ruux waliba tuu caashaqaa waw cambaro Dhoole.

وللناس فيما يعيشون مذاهب

Every man to his taste.

- Ruux waliba wuxuu qeyb u jeclaado isaga uun baa og. Waxaad jeclaatidna carrabka kama dhigtid. La arkee in ruux kale si kale ay la tahay, se, waa tii la yidhi :  
«Wax adiga kula silloon ayaa ruux kale la toosan oo la qumman».

86. Ruux waliba wuxuu hooyadii la yahay hal madheedha.

القرد في عين أمه غزال

Every ass loves to hear himself bark.

— Waa run oo, waa tan haddana, la yidhaahdo. «dameertu waxey hooyadeed dabada uga nuugtaa waa isku hallayn».

87. Ruuxu ma cigaal shidaad baa !!!

فلان أجبني من هبنة

He is as cowardly as a wild duck.

— Cigaal Shidaad wuxuu ahaa ninkii fulannimada caan ku ahaa, waa kii isaga oo socdaal u kacay wuxuu maalintii uu socdaba, kolkii ay habeen noqotay siduu u socday ay wax hortiiisa ka muuqdeen, ka dibna istaagay oo wixii intuu ka baqay dhuuntay taniyo intuu waagu ka baryaayay Kolkuu waagii beryey uuna hubsaday wuxuu ka baqay in uu qori yahay dabadeed yidhi, «Qoriyow ma waxaan ku mooday, mise waxaad noqotay, mise waxaan loo noqon doonin - waxaan ku mooday baahl, qori baadse noqotay waxaanse loo noqondooin waa anoon hadda ka dib habeen guurayn doonin».

88. Ruuxba dhiishuu ruxduu caanaheeda dhamaa.

كما تزرع تحصد

As you sow, so you shall reap.

— Waa eray dhab ah, ruuxba wuxuu tabcado ayuu hejaa ama beer uu falay ha noqoto, ama xoolo uu dhaqday ama dad kale oo iskaashato uu la galay ha noqoto. Si kalena eraygu wuxuu u dhici karaa : Ninba wuxuu dad kale yeelo isagaa isyeela.

89. Ruuxba wuxuu dhiteystuu sharcigu dhaanso yidhaahdaa

كل نفس بما كسبت رهينة

Vice its own punishment, virtue its own reward.

— Ruuxba wuxuu galabsaday buu la kulmaa (Shar iyo kheyriba) sidii ninkii gabyay uu yidhi «Nin walba wixii loo katibay waa la kulansiine».



90. Ruuxna siduu isu yaqaan maahee, waa sida loo yaqaan.

ليس الفتى من يقول هانذا : بل الفتى من يقول كان ابي

Don't praise yourself among men, but let men praise you among themselves.

91. Runtu ma fantaa ! ! ! !

الحقيقة أمر من الحنظل

Facts are stub-born facts.

— Runtu waa hal cad waa shay dhadhankeeda aanu jecleysan ruuxa aan rabini, Kanaxdiinsiinna wey leedahay sida horeyba loo yidhi : «runi ma fantaa! sida rumeygu uu ilkaha u caddeeyo ayaa ruuxa geesi ahina uu hadalka u caddeeyaa, runtaasi, wax kastaba ha ku gaadhee.

92. Runi, rag waa ka nixisaa, waxse, ma yeesho.

الصدق منجاة

Truth will conquer.

— Dad bulsho ku wada nooli waa dhici kartaa in mararka qaarkood lays qabto oo hadalku moogtamo kolkaasna aadaminnimada ayaaba ku fareysa in dadka aad kala dhexgashid — waana sida, loo yidhi : «Reer degaayana tus baa loo tuuraa - rag is-hayana eraybaa lagu tuuraa».

93. Riyoba, jugtoodaa shalow u soo jiidda.

على نفسها جنت براقش

To dig your grave with your teeth.

94. Salaad nin qalleeyay sii daa.

من أخطأ فقد أخفق .

He that ceases to pray. ceases to prosper.

— Hawl kastaba, ruuxaan waqtigeedda ku toosini waxa ay ku noqotaa oodo dhacmeed oo iskor baxay. wahsina, wehel ma aha, wax la dugsadona ma aha.

95. Salaad walba waqtigeedaa la tukadaa.

لكل زمان آية

Other times, other manners.

Si kalena waa tan loo yidhaahaa : «waqti waliba da' la filuu leeyahay.»

96. Samafale, sedkii ma lumo.

الناس عبيد الاحسان

Two wrongs do not make a right.

97. Samataliye sedkii waa janno.

الدين النصيحة

To advise is true faith.

— Sida horeyba loo yidh: «diini waa waano, waanona weel-keedu waa calool, caloolina, haddaanay culniin helin waa caabuqdaa».

98. Samo lama wada leysan karo.

كل معروف صدقة

It is always time to do good.

— Samaha uu ruux falo, sadaqaddu bixiyana ha ahaatee, waa sed meel u yaal oo kale, mana lunto, mana duugowdo.

99. Sirow ma hodmo, sakhaawena ma deego.

الخائن يختنق

Cheats never prosper.

— Ruuxa wax siraa ma samata baxo, kan gacanta furanina ma ceydhoobo subag xeedho ku daatayna, sina kuma xu-maado.

100. Shabeel aanad dilin haraggii lama iibiyo.

• قبل الرماء تملا الكنائن

Catch the bear before you sell his skin.

- Ujeeddadu waxa ay tahay in arrin kastaba ay fiiro u baahan tahay oo intaanay saldhigin amaba laga gungaa-dhin laysa siin, waxaana sida lagaga yeeshoonayona waa wax meel u yaal.

101. Sharku yaryareysi ma leh.

الشر قليله كثير

The evil has no choice.

- Belaayo intii kaa soo gaadhaaba waa intii kale, sidaa daraadeed, ayaa loo yidhaahaa, «belaayo ha u yeedhan kuumaba, timaadee ! ! ! ! !».

102. Shir looma wada uunsiyo.

• لكل مقام مقال

All truth is not always to be told.

- Hadalku, hadiyo jeer ma qumana in leyska rido, ha dal kastaba meel ayuu leeyahay iyo waqti ku habboon oo loo baahan yahay in la maqlo. Hadallada qaarkood: ruux kastaba, lalama jecleysto inuu wax ka maqlo. Waa-yo. . . . ! ! ! ! ! waa sida loo yidhi, kuu sheekeeye, kaa sheekeeye, lalama sheekeysto.

103. Shimbir waliba, shimbirkiisuu la duulaa.

أن الطيور على أشكالها تتبع

Birds of feathers flock together.

- Maahmahdani, waxa kale oo ay ku tuseysaa, haddaad ruux qeyb u garan weydo, ruuxa saaxiib la ah ka garo. Waana tan la yidhi : «ninkaad tahay aan kuu sheegee, ninkaad la jirtid ii sheeg».

104. Shimbiri laba geed kama wada berdeysato.

• يضرب عصفورين بحجر واحد

To kill to birds with one stone.

— Ruuxna ma jecla inuu labada gacmood wax ku cuno.

Waxaa taa la mid ah sidii loo yidhi, «hal laba geel u wada hoyataa dhexdoodaa waraabe ku haleelaa».

105. Shimbiri mar bey dab qaaddey markiina min Alley gubtey.

• سكت الفأ ونطق خلفا

Much ado about nothing.

— Ka jir, midhkaa, yaan ubadkaagu ku hana qaadin e.

106. Dhacdee, miyaa la leefi.

• سبق السيف العذل

Sooner said than done.

— Waa wax dhacay oo goor dambe lagu hambabaro in wax laga qabto. Waqti tegeyna lama tiigsado.

107. Dhagar qabe dhulkaa u dhaqaaqa.

• يعرف المجرمون بسيماهم

A guilty conscience needs no accuser.

Wuxuu is-yidhaahaa ruux kastana wuu ku arkayaa, wax kastaana waa ku sheegayaan - siduu, sidaa u yahay ayaa qun yar tunka la soo qabtaa.

108. Dhahar yidhi Alle yidhi.

فإن القول ما قالت حذام .

The queen can do no wrong.

109. Dheri la kor taagan yahay ma karo.

لقد صبرت حتى عيل صبرى .

A watched pot never boils.

— Waxaa kaloo la yidhaahaa, «dheye ceydheed ma dhasho» waa qoys sac ama hal keliya leh oo eeganaya inay kolba foolaneyso iyo in kale.

110. Dheriga tuumiga waxa ka keenay waa kuleylka.

لادخان بلانار .

No smoke without fire.

— Ruux aad u cadhooday oo ka dib cadhadii wax ku geystay, kolka la uur baadho; la arkee, in cadhadii loogu garaabo. Waxa cadhada ka keenayna wax la'aan ma aha ee, waa wuxuu qabo oo loo geystay.

111. Dheg haddii la gooyo, daloolkaa hadha.

انفك مذك وان كان اجذع .

Do not cut your nose to spite your face.

— Ruux aan ceebta meelna kaala tegeyn (ama dalka oo idil-ba ha ahaatee) lagama hadho; waayo waa sida loo yidhi: «baruurarba baruur keliyaa qudhmisa».

— Waxa si fudeyd ah ama fiiro aan la siin kaaga tagaa dhi-baato dambe ayay u geystaan kol aad hambabaartay oo aan markaa arrintu wax ka qabasho ama ka dabatag aanay lahayn.

112. Dhegeyso - afkaaga caanno geel lagu qabaye.

فَاعْلَمْ عِلْمَتَ الْخَيْرِ .

Know - be goodness with you.

- Kolka aydin qof wada hadleysaan ee hadalkii si fiican idiinku, socdo - oo kolba eray aad rabtay ama arrinta si daad u dooneysay uu ruuxu ku soo dhaco, ama dacalba ha ka taabtee, si aannu uga leexan daraadeed, ayaad oo-dhaahdan oo kale la maragsataa - inuu hadalku idiin socdo.

113. Dhubuqdhubuqsi hore dhabanna heys dambey leedahay.

وَلَاتِ سَاعَةَ مَنِّمٍ .

Marry in haste, repent at leisure.

- Goortaasuna waa goor xeedho iyo fandhaalba ay kala dhaceen waa sida loo yidhi: «hu' aanad lahayn ma huwan kartid». waana sidaas oo kale - waxa aanad si daacadeed ama si run ah u qaban, in ay kula dheeraatoba« kol uun baa wax ka muuqdaan oo dibindaabyadii aad wadday lagugu gartaa».

114. Dhul lagu indha la' yahay haddaad tagto, indhahaa leyska ridaa.

فِي بِلَدِ الْعَمِيَانِ الْاَعْوَرُ مَلِكٌ عَلَيْهَا

Among the blind the one eyed is King.

- Ulajeeddadu ma aha in leys indha tiro, se, waxa laga wadaa, meel kastaba, dabecadda uu dadku iyo dalku uu leeyahay ayaa leysu ekeysiiyaa. Ma haddii kalaa, waxaa aad meeshaa ku noqon doontaa, tuke baal cad oo kale.
- Tani waa saddex shub. Waxaana loola jeedaa dad kasta-ba iyo dal kastaba camalkeeda ayaa la yeeshaa, dadkana lays kama saaro ee beeshaadaa laga raacaa.

115. Dhuumadhuumeysi dhabarku muuqdaa, dhuumeysi ma aha.

تلبیری تصیدی .

to play hide and seek.

— Waa sida loo yidhi : «hu aanad lahayn ma huwan kartid».

116. Cadar xaga ceel kaama furto.

سحابة صيف عن قريب تتشع .

The morning sun never lasts for the day.

Waa sida loo yidhaaho bil saddexaad, beeshaadana waa kaa kaxeysaa. beela kalena kuma gaadhsiiso. Si kalena, waxa aanad naftaada u tabcan oo dhididkaagu ku bixin, inkastoo, aad wax dad kale ama bulsho kale la timaado, oo aad maalmo ku meel gadho, aakhiritaanka arrintu waa kula soo qadhaadhaataa, oo dib uma mahdisid.

117. Cadawгаа isaga nooloow ama cadowгаа u nooloow.

تأكل لتعيش أم تعيش لتأكل

Live not to eat, but eat to live.

— Kan hore, waa qofka awooddii iyo tamartii la saluuggo. Hebel cadowgii ha isaga noolaado. Kan kalese, waa qofka kartida la bido.

118. Caqligii fayooobi, jidh fayow buu leeyahay.

العقل السليم في الجسم السليم

A sound in mind in a sound body.

- Maahmaahdani waa saddex shub, waana sida loo yidhaa haa, «Jidh aan ciyaarini wuu caabuqaa». Soomaaliduna cayaaraa hiddaha, hore ayay caan ugu ahayd. Kuwaa is-boortiga ahna sida kuwa cagta, gacanta iwm. naatan heer fiican ayay ka mraayaan, danaha laga leeyahay waa sida ay murtiduba ku baxday.

119. Canaan la'aan carruuri ma korto.

ان العصى لمن عصى .

Spare the rod, spoils the child.

- Canaanta carruurta, iyadoo ay tahay shay lagama maarmaan ah. haddana, barbaarinta cilmiga ku dhisani waxa ay ku fareysaa inaanad cannaanta badinin si guhaaddu aanay carruurta u bahsin. Haddii canaantu kula soo gudboonaato, ka jir, ilmahaagga, «canaani carruur ma koriso» e. waa tii hore loo yidhii.

120. Cayaar la'aan caqligu wuu caabuqaa.

الرياضة تصون الجسم كما يصون العلم العقل .

All work and no play makes Jack a dull boy.

- Cayaaraha oo hiddaha soomaaliyeed qeyb weyn ku lihi, waxa ay kulmisaa carruur iyo cirrooleba. rag iyo haweenba. Waana mid hidde loo lahaa, haaatanna loo leeyahay, loona lahaan doonaa.



121. Caado la gooyaa cadho Alley leedahay.

من قطع العادة عداوة .

Customs rule the law.

- Dal iyo dad kastaba, caadooyin iyo hidde gaar ah ayey iska leeyihiin kuna tilmaaman yihiin. Caadooyinka qaarba waa si, qaarbaa fiican, kuwona laga fiican - kuwa murtida iyo dhaqanka ku tilmaamani waa kuwa mujtamaca oo idili uu ku dhisan yahay sida deeqda, iskaashiga istaageeridda iwm.

122. Ceel aanad ka biyo gaadheyn lama qado.

يبنى قصورا بغير أساس .

Kindle not the fire that you can't put out.

- Waxaa eraygu uu daaran yahay, in wax kastaba fiiro loo yeesho ka sokow, uu u baahan yahay qorsheyn iyo jaangooyntaan wixii (lagu dhaqaaqin) si guul looga gaadh, sidaa la'aanteedna, waa «biyo col dhaansaday» oo kale.

123. Cidna uma maqna. Ceelna uma qodna.

من كثرة الملاحين غرقت السفينة .

Many cooks spoil the broth.

- Meeshii ciidan badan la geeyo waa in ay tacab baura ah ka qabtaan haddii tacabka sida la doonayo laga waayo ciidanka badani qoonsimaad buu leeyahay.

124. Gari laba nin kama wada qosliso.

رضا الناس غاية لاتدرك

No one can satisfy no one.

- Kolka arrini ay dad dhex marto sida badan, dhinac uun baa gartu raacdaa, haddana sida qaaliibka ah, hadalka qumman ee lagu dhex galaa wuu raaligeliyaa, sida loo yidhi: «rag hadal san baa gaadha, hungurise, ma gaadho»

125. Gari Illaah bey taqaan.

العدل لا يعرف الدموع

Law is law. . .

- Gar dad dhex joogta cidna looguma aabbe yeelo, se, gartu kolba waa cidday raacdaa. Waana sida kalee loo yidhi; «gari laba nin kama wada qoslis».

126. Garawshiiyo waa geelsiin.

التائب من الذنب كمن لا ذنب له

A fault confessed is half redressed.

- Hadduu ruux meel kaaga dhaco, ka dibna uu kuu qirto, waxa aad tahay nin gartii la siiyay - kolkaa waa ruux ar-rinta halkaa ku dhaafa sida badamaaba dhaeda, iyo ruux jecleysta sii wadkeeda iyo lafa gurkeeda.

127. Garow iidaankii waa gaajo.

ورب مخمصة شر من التخم

Hunger is the best sauce.

- Xikmad ahaan ka sokow, eraygu cilmi ahaan, dhiraca caafimaadka ayuu ku eg yahay. Kolka calooshu furfuranto, wey ka roonaataa kolka kale ee la cusleeyo. Cuntaduna dhadhan fiican waxa ay kuu yeelataa kolka ay baahidu kuu qabato, waana sida soonka oo kale ee farad Ilaaheen inagaga yeelay ka sokow, xikmadda ku jirtaa waa in ay calooshu ka nasataa cuntadii joogtada ahayd (waxaa jidiinka la mariyaana, waxa ay waxtar kuu yeeshaan kolka ay baahidu ku qabato).

128. Gacantaadoo dhudhub gasha, laguma soo dhiftee, waa laga dhirindhiriya.

مما زاد الطين بله

Add fuel to the flame.

- Haddii arrini meel cidhiidhiya kaa gasho, lama sii cidhiidhiyee waa la soo fagaa. Waa arrin dhoobeysan lama sii dhiigeeyo oo kale.

129. Gaashaanqaad ma anbaado.

حبك على غارك

What ever you are, be a man.

130. Geedjoog, gartii wuu yaqaan.

على الخير وقت (المسألة)

Experience is a great teacher.

- Nin abwaannada Soomaaliyeed ka mid ah baa mar yidhi «aniga weli gar laysula yimid, laygama helin».

Kolkii la weyddiyay waxa ay sidaa ku noqoteyna waxa uu yidhi «garteyda, ayaan intaan shirka la iman aan sii naqdaa».

131. Geed laga dhacay, gacmo lalama tiigsado

وعمل يستقيم الظل والعود أعوج .

Between two stools you fall to the ground.

132. Geeridu kolbey nolosha dhaantaa.

رب عيش أخف منه الحمام .

He that fears death lives not

- Nolosha ay geeridu dhaantaa ruuxna waqtigan oo kale ma mooga, siyaalahaasuna, waa sida dad kastaaba uu gobanimo iyo xornimo aan shuruud lahayn uu u daba joogo si noloshu kaddib, ugu noqoto mid cisi iyo sharafba leh.

133. Gees lo'aad kuleylkaa lagu gooyaa.

اذ صوبت فأوجع .

Strike while the iron is hot.

— Arrin kula soo gudboonaatay intay dihin tahay haddaan wax laga qaban, la arkee in meel dheer laga doono. Arrini intey cusub tahay ayey wax ka qabasho leedahay.

134. Geesi, kol buu dhintaa, fuleyna kun jeer.

الشجاع يموت مرة ، والجبان ألف مرة .

Cowards die many times before their death.

— Ruuxa fuleyga ah maahmaaho badan baa ku soo arrooray. Ruux qarsoomi karana ma aha. Waxaa kaloo la yidhaahaa «fuley habartii ma gablanto». Maahmaaduna waa saddex - shub.

135. Geel geel weydaartay geeda la'aan baa leh.

اذا ذهب غير فعير بالرباط

Pigs grow fat, where lambs would stray.

136. Geel, fudeydna kuma rimo fudeydna kuma dhalo.

ما هكذا تورد الابل يا سعد

No gains without pains.

— Geelu wuxuu ka mid yahay saddexda shay ee la yihiin :  
Saddex culeys bay ku roon yihiin,  
Geel culeys buu ku roon yahay.  
Haweenna culeys bey ku roon yihiin.  
Nabadina culeys bey ku roon tahay.

137. Geela duqdiisii durdurisay, aarankiisana maxaad mood-day.

اذا كان رب البيت بالدف ضاربا، فشيمة أهل البيت كلهم الرقص

He runs with hounds, and hunts with the hare.

138. Gobanimo la hantiyay laguma dheelo.

والحرية الحمراء دم يراق

Freedom is to give not to take.

- Xornimo dad iyo dalba loo soo dhintay, dhidibka oo loo adkeeyo ha joogtee, in dheeldheel iyo dockawareen iyo gefafba lagula kacaa, waa dembi kii u weyn. Ruuxa gefkaas oo kale la yimaadaana, taariikh madow ayuu isu reebaa.

139. Goof madhan malab shinniyeed kama guratid.

انك لا تجنى من الشوك العنب

Never a rose without thorns.

- Waxa ay ka dhigan tahay «beer aanad falan badar kama sugtid». Shareecadeennuna waxa ay ina fartay inaan cirku dahab iyo lacag soo da'ayn, se, ruux kastaba waa inuu hawl (ugu yaraan xansas xaabo ah oo la gurtana waa dan) ee uu u hawl galaa si uu naftiisa iyo inta la raaciyey uu u shaqeeyo oo uu u hawl galo. Ruuxa aan dhi-didkiisa wax ku qabsan, dheef, sina uma dhadhansho.

140. Guriga ma gadin e, jaarkiis baan gaadayaa.

اخذ الجار قبل الدار

Choose your neighbour before your home.

- Miyi iyo magaalaba, tastuurta kama tagana, intaan guti la degin ama beel meel taal lala gelin, in fiiro loo yeesho cidaha qumman ee lala dhaqmi karo. Beeshii canbaareysan lalama degi karo taasna waa tii laga yidhi : intii adhi foof jiraa laga fogaadaa.

141. Far keliyi fool ma dhaqdo.

بالمساعد يبطئ الكف

United you stand, divided you fall.

- Wadajir iyo wadajir la'aani wax leysku doorsan karo ma aha. Diinta Islaankuna, si weyn bey ugu xeel dheeraatay. Xadiisyada ku soo arooray waxaa ka mid ah «Ilaaheen wuxuu la jiraa ururrada isla jira». Ninkii gabyeyna wuxuu yidhi, «Istaageerid bey laba gacmood tamar ku yeeshaane. Tiska waxa la qaadaa kolkay tiirisa bidixe. Haddii midigtu keli taagan tahay tahar ma goyseene».

142. Faras dheereyaba gorros ku dar.

لكل جواد كبرة

Do not spur a willing horse.

- Waxa ay ka dhigan tahay ruuxi wax istaaweeyaba, kolbaa taladu ka duushaa, oo uu meel ka dhacaa. Laakiin ogsoonow, ninkii fiicani waa kan kacaakufaa.

143. Fari togdheer bey kula xushaa.

معظم النار من مستصغر الشرر .

Fire begins with little sparks.

- Arrini inta ay qabasho leedahay baa wax laga qabtaa, kolse, hadday faraha ka baxdo waa adag tahay sida wax looga qabtaa waana tan la yidhaahdo : «Gees goodir, kuleylkaa lagu gooyaa».

144. Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa.

الكسل مفتاح الفقر .

Laziness is the key of poverty.

- Ruux aan u dhibtoon wuxuu dheef ka heli lahaa, ma suurtoowdo inuu hawl yari ku helo, tacab kastana mid duniyeed iyo mid aakhiraba karti iyo dadaal baa lagu gaadhaa.

145. Falkooni waa feejignaan.

الموقاية خير من العلاج .

Prevention is better than cure.

- Kaneece maxaa ka taag daran! Kolkaad ka feejignaan tahay meelahay ku badan tahay, yuuskeeda mooyee, midh yar oo kiiniini ah oo aad hore u liqdo ayaa dhibaata-deeda kaaga filan.

146. Fiqi tolkii kama janno tago.

الابن حصيل أبيه .

A child is father of the man.

- Ulajeeddada maahmaahdani waa ballaadhan tahay. Halkani, tolka waxa loola jeedaa ummadda (nation). Ruux shiikh ah oo caalin ah lagama filo inuu dalkiisa iyo dadkiisa wax kastaba ha ku noolaadeen e, uu ka hawocdo oo xer dheer ka qabto. Tan labaad, inkastoo ay mararka qaarkood; dadka qaar ay ka suurtoowdo in jinsiyaddoodii asalka ahayd ay mid kale ku doorsadaan, had dana, hiddaha soomaaliyeed, middaasi, waa shay ku qal-lafsan. Waa ma dhacdo oo kale, ayay taasi ku tahay hu' aanad lahayni hu' kuuma noqon karo.

147. Fulay habartii ma gablanto.

ان الجبان حثفه من فوقه .

A cowardly person easily escapes.

- Ma goblanto waa run - - waayo - - meel cabsi leh, kii ku dhiirada ma aha inkastoo, mararka qaarkood la arko in ruuxa fuleyga ahi uu wax ka qalab badan yahay.

148. Fuullimaad waa fara ku hayn.

• القدرة تذهب الحفيظة

More practice makes perfect.

- Farda fuulleenku waa ka mid hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed. Fardaha dhaqaaleyntooduna waa farsamo gaar ah oo dadkeennu meel kastaba ha ahaatee, uu ka siman yahay. Meelaha qaarkoodna, si fiican ayay fardu-hu ugu dhaqmaan.

149. Qacda hore layga tegyaaba, qacday yeedhay.

في طلعة البدر ما يغنيك عن زحل

First impressions are most lasting.

- Sida kalee loo yidhaahaa waa :  
«Nimaan hawraartiisa hore ku deeqini. hadalkiisa dambe kuuma dhadhamo».

150. Qeedhiin iyo biseyl wixii ka dhexeeyaa waa yacyacood.

الحلال بين ، والحرام بين ، وبينهما أمور مشتبهات

Sink or swim.

- Sida kalee loo sheegaa waa tusaale cad.  
Kolkaad arrin wax laga qabanayo ee aad cid u jeediney-sid si mugdiga looga saaro aad rabto ayaad baabacada gacanta marna kor u wadhaa marna hoos u rogtaa, kolka saddexaad ee aad iyada jirjirka u taagtidna waa kolka arrintu ku tilmaaman tahay «yacyacood:» oo kale/ Ar-rinta aan labadaa siyaale u dhicini waa midda, laga noo-gaa ee aan sina u dhicin.

151. Qosol badani, qoonsimaad buu leeyahay.

• كثرة الضحك مشكوك فيه

He laughs best who laughs least.

- Sida la og yahay, faraka-ciyaarka iyo kaftanka badanba iwm sida badan. waa leysku nacaa, sidaa aawgeed, ayaa-nay dhinaca aadaabta iyo asluubta ku qumannayn-ruux-xa siyaalaha ku kacaanna waa ruux shakhsiyaddiisa wax u dhimay. Marar, uu haasaawuhu qosol leeyahay waa jirtaa, laakiin, qosolku siddiisa u badani ruuxa hey-badda ayuu ka ridaa.



152. Qofku waa meel madhan.

أفرغ من فؤاد أم موسى .

He is as hollow as a drum.

— Waa ruux tamartii la saluugsan yahay. Waa ruuxa aan hal adkayn ama sidaa, codkar u ahayn.

153. Qun yar socde qodaxi ma muddo.

من سلك الجدد أمن العثار

Better ask the way, than go astray.

— Waxaanad u miyirin mus baad ku laashaa. Miyir la'aan dhibaataad kala kulantaa ama qoomammo bey kugu keentaa ama khasaara weyn.

154. Quud aan jirin qoryo haw guran.

جمعمة ولا اري طمنا

Empty vessels sound loud.

155. Kab xume ma hadhee, kab laawaa hadha.

شيء أحسن من لاشيء .

Something is better than nothing.

— Adba waad garan kartaa, wax yaroo lagu baday in ay kolleyba ka roon tahay wax la'aan lagu diray. Si le'eg, ruux kabihisu ay duug yihiin ama dhawr meelood ay ka go'an yihiin wuu ku socon karaa, yaanuba ku dhacereyn e, oo kan cagaagan ee «shantaba dhigaya kolleyoa wuu dhaamaa.

156. Ka door, ka dar, bey dhashaa.

مما زاد الطين بله

Add fuel to the flame.

— Waa kolka arrin dhoobeysan aad sii dhiiqeysaa ama arrin dhibaato leh aad sii dhibaateysaa.

157. Karti laawe, degdeg, buu doorbidaa.

• العجلة فرصة العجزة .

The short cut is always the longest.

— Waana sida loo yidhi, «ugaadha tii horbooddaa ma badi-so neefkaasuna horcad ayuu leeyahay.

158. Kal baxnow kariinkaaba kuma kadee ! ! ! !

• كن جميلا ترى الوجود جميلا .

Better be happy than wise.

— Eraygani falsafad weyn buu ku qotomaa. Ruuxa dunida iyo nolosha aan qoollad iskaga dhigini ka roon intuu doo no, ruuxa cabashada badan leh, ee naftiisana hiifa, dunidana madow isaga dhiga. Ruuxo diirdiirsanise noloshiisuna waa diirran tahay.

159. Kolka weylaa la helaa, lo'da la maalaa.

• متى عرف السبب ، بطل العجب .

When rogues fall out, honest men come into their own.

— Xaajo aan kar bislaan lagama hortago, arru kastaba kolka ay kula ekaato ayaa wax laga qabtaa. haddaan, ka hortegisteedu lagama maarmaan aanay ahayn.

160. Kuu sheekeeye, kaa sheekeeye. lalama sheekeysto.

• ذو الجبين لا يكون عند الله وجيها .

Who chatters to you, will chatter of you.

Kaas oo kale, waa ruuxa la yidhaaho : waa laba wajiille, ama laba canle, laba codle.

161. Kuuduudsani, keyd ma dhasho.

• الحركة لها بركة .

No hay without rain.

— Waa run oo ruuxna dhaqdhaqaaq la'aan tacab ma keeno; dheefna ma helo. Sida kaloo loo yidhaahaana : waa «Fadhi iyo fuud yicibeed leysku waa.

162. Laba daran mid dooro.

بعض الشر أهون من بعض

Of the two evils choose the less.

- Waxa ay tahay, haddii laba arrimood oo kala darani ku-la soo gudboonaadaan, amase, laba belaayo koiba :ii la-ga fursan waayo ayaa la doorbidaa - waayo, waxaanad ka fursaneyni faallo uma baahna.

163. Lax dhukani col iyo abaarba moog.

حبك الشيء يعنى ويصم

A blind man's wife need not be beautiful.

- Waxa la mid ah, oodhaahda kalee ah «Ismoog dhuggii bey asleysaa.»

164. Lama huraan, waa cawska jiilaal.

لا بد مما ليس منه بد .

What is done can't be undone.

- Waxaad ka fursan weydaaba waa wixii kale. Galleyda ma cuno kalluunka iyo khudraddana ma agmaro waxa ay haatan noqotay war la soo dhaafay. **Waxa haatan la o-gaaday** inay intuba cunno nafaqo leh ay yihiin. Waqtigan oo sicirka cuntada dunidu uu cirka isku shareeray ayaa dal kastaba dhaqaalaha dalkiisa nooc kastaba uu dib ugu noqday, kolkaasuu khayraadkii waa'gii hore ka xidhnaa ka haqab-beelay.

165. Libaax nimaan aqoon yaa hilbo ka rita.

كمبتغى الصيد فى عرية الاسد .

You can't make a silk purse out of sow's ear.

- Nimaan libaax dhibaataadii la kulmini, waxa uu yahay iyo waxyeelladiisu, midna, wax lama aha kaas oo kale kama duwana kan lage yidhi : «Habar fadhida, legdini wax ugu fudud.

166. Lugtu haddey jeeniga dhaafto wey jabtaa.

• اما خبت واما بركت

Extremes are dangerous.

- Oodhaahdani, xikmad ahaan ka sokow kas iyo maan ahaan waxa ay ka digan tahay maahmaahda kale ee ah . «dundumo hadday dheeraato, dhulkay ku soo noqotaa» - sida dheriguba, kolkuu aad u karo, uu daafaha uga daato.

167. Madaxaaga iyo manjahaaga toona lagama boodo.

مذرت رجلك قدر فراشك

Cut your coat according to your cloth.

- Wax kaloo ay maahmaahdu u dhaceysaa, «kolba salaaddaad joogtaa la tukadaa». Wixii aad kolkaa heysatid ayaa wax lagu qabsadaa, qiyaas iyo fiirona wax kastaba waa kaa doonaan.

168. Mar i dage Alle ha dago, mar labaad i dagese, anaa dagan.

لا يلدغ المؤمن من جحر مرتين

If a man deceives me once, shame on him, if twice shame on me.

- Tani, saddexshu bey u dhaceysaa. Waa tan la yidhaahaa. «ruux muumina god laba jeer, lagama wada qaniino, (xadiis).

169. Marti badan, iyo baryo badanba, waa leysku naca.

• ومن أكثر الترداد يوما سيحرم

A constant guest is never welcome.

- Inkastoo Soomaalidu ay deeqda iyo martisoorkaba ay aad ugu tilmaaman tahay, reer miyigu haba ka sii xag jiree, haddana, waa dhab in cagta iyo gacanta joogsan weyda ay qoonsimaad la timaaddo. Ruuxa socodkiisu amaba cagtiisu ay joogsan weydo waa sidii loo yidhi : «Cagtii joogsan wdeydaa mar bey ceeb la kulantaa e».

170. Maroodigu takarta ku joogta ma arkee, tan, kan kale ku joogtuu arkaa.

يرى الفذى فى عين أخيه ويعمى الجذع فى عينه

The pot calls the kettle black.

- Waa ruux ceeb uu leeyahay (ama caado uu leeyahay) cid kale ku cambaareeya oo kale.

171. Maantana far baan meydhayaa, hay fadhiyo geelu.

الماطلة مضیعة للوقت

Procrastination is the thief of time.

- Ula jeeddadu waxa ay tahay, sidii horeba loo yidhi, «hal maqaarka diideysaa daldalool bey ka eegtaa.» Waana sida ay «Arra weeloba» u tidhi iyadoo diidsan in geela beesha oo kal dhaafay la arooriyo.

172. Maangaab meel ka dhac waa leeyahay, meel u dhacse ma laha.

من قلة تدبیری بری اكل شعیری

Many find fault without an end, and yet do nothing at all to mend.

173. Maangaab maalkii iyo maalintiiba laaban.

- Maahmaahdani waa mid xikmad iyo waano ay ka soo jeeddo. Waa mid gaar ahaan dhallinyarada, si weyn uga digeysa in ruuxna waxa uu marka gacanta ku taabo maah-  
hee, aannu wax kale wax ku qabsan karayn. Casharkan maanta wax ka qabashadii aan la sugo kan berri, iyo kan ka dambeeya, waa hawlo kuu tuulan oo sii cuslaatay oo kale. Wax kastaba waliilkiisuu leeyahay - maantana waa **maalin beri** danbena waxa uu la iman doono kama warqabtid.

174. Midha herdde, duuduubkaa lagu leqaa.

• والعفو عند خيار الناس مقبول

To forget a wrong is the best revenge.

— Waxaa loola jeedaa kolka ay ruuxa ku habboon tahay in waxyaallo loo geystay uu isaga dulqaato oo aanu faadh-faadhis iyo baadhista u yeelan.

175. Midho geed saaran, midho guntiga kuugu jira looma daadsho.

• عصفور في اليد خير من عشرة في الغد

A bird in hand is better than the ten in the bush.

176. Murtidu waa hodantinnimo, odhaahdeedna waa deeq.

• الادب مال واستعماله كمال

Wisdom is a treasure.

— Caqliga fayow ee xikmad iyo murti u dheer tahay waa mid dux leh oo qiima weyn ku fadhiya. Murtiyina waa hanti ummaddeed ruuxa ku deeqaa, wuxuu la mid yahay, sidii kii yidhi. «ninkii gurigiisa ka soorana nin dheh, kii goryo kale kaa soorana niman yaal dheh.

177. Muruqa laba suulle ninba si ku ah.

• ماء ولا كصدا

Fancy kills, fancy cures.

— Waxa kaloo la mid ah maahmaada ah «arrin nin la toosani nin kale tuur la leh». Dhinaca aad marka arrinta ka egeyso maaha e dhinac kale ayuu ruuxa kalena ka eegayaa.

178. Musuqmaasuq waa malahmalah meheraddii.

المخاتل مخادع .

A double deed is a double - cross.

- Musuqmaasuq, afmiinshaarnimo, malahmalah intuba waa meheradda dadka ku shaqeysta sidii sayid Maxamed Cabdulle Xasan ku tilmaamay : «Makhsin laguma xidho xoolahoo moosiino yimiyee, Mushtarkiyo mabaaciggu wax bey kala macaashaaane, Mufta gacanta laga siinayaa mawdka ka adeegi».

179. Mukulaal minankeeda joogtaa mici libaax bey leedahay.

كل من في بلده مصر.

A man's house is his castle.

- Sida kalee loo yidhaahana waa «mukullaal minankeeda da joogtaa, libaax bey ismooddaa. Laakiin kolkaad meelaha qaarkood ka maqashid, minanku minankaa weeye, so dhowow, hays martiyeyn». Ka fiirso waxa loola jeedaa inaanad tallaabo kale hore u soo qaadin. Maahmaahda kalee tan la mid ahi waa: Baqal fardo la miratay, ka mid bey ismooddaa.»

180. Nabadi, waa sahayadaadood suxul ku sidataa.

السلم غنيمه المسافرين

No peace without security( order and law).

- Dhul nabadi taal, waa dhul degniin ku sugan, ruux socdaal ahina wax lur ah lama kulmo. Waxaa kaloo creygan ka dhigan. «Qaalin raroo, qaan la'aan guur». Waxa aad kolkaa heysataa haba yaraadeen e, waad ku caloolsamaataa haddaad doorto inaad socdaashid, qaan la'aan dembi iyo godob la'aan ayaad dhulka u mushaaxdaa.

181. Nabadgelyo la'aan lama ledo.

لولا الوئام، لهلك الانام .

If you want peace, be prepared for peace.

- Ducada waa tan lagu daraa nabadda iyo nabadda oo waarta. Meel aan nabadi oollini waa meel cadho Alle taal. Nabad iyo colaadina wax laysku doorsado ma aha. Colaadi waa fidmad, fidmadna Eebbaa ceebeeyey. Nin-kii la dooran siiyey laba midkood ee la yidhi : iyamaad doorbidday, dhul abaar ah se, nabadi taal iyo dhul bar-waaqo ah, se, colaadi taal, «kan hore ayaan doortay», ayuu yidhi.

182. Nabar doogi ma hadho.

ما لجرح بميت ايلام .

Old wounds soon bleed.

- Haddii mar uun ruuxa uu nabar culusi gaadho, siiba, intuu ruuxu yar yahay, nabarkaasu hadduu horeba ka bogsado inta badan, doogtiisu beri dambe ayay kugu soo kacdaa. Nabarrada ruugga, xoogga, canqawga iwm. Kaa gaadhaan waa ka sii xag jiraan. Waanaa tan la yidhaahde «doogi nin leh bey dishaa».

183. Nabsi bil ha jiro, boqolse ha jiro, ishaa baalkeeda ka dhaw.

ما بين غمضة عين وانتباهتها يغير الله من حال الى حال

A wonder lasts only nine days.

184. Naaska walaalkay taabtay kolba waa sidaan ka dhigtaa.

يعمل من الحبة تبه

To make mountains out of molehills.

- Waa kolka arrin yar oon sidaa u sii ridneyni uu ruux kale wax culus ka dhigo - - arrin fudeyd noqon kartana, culeys laga dhigo.



185. Nimba meeshii bugtaa isagay 'jelbeshaa.

أياك أعنى واسمعى يا جاره .

Every one knows best where the shoe pinches.

— Waa kolka la leeyahay oo kale, hadalku wuu kaa shi-sheeyaa oo si kale ayuu u dhacayaa, cid kalena waa uu tilmaamayaa.

186. Nimba wuxuu doonuu garaadkiisa leeyahay.

الرغبة وليده الذكرة .

The wish is father of thought.

— In ay sidaa tahay waxa u nadiir ah «nin ooman hoo biyaa deeqaa», ayaa la yidhi.

187. Nimaad jeceshahay ceebtiisu kuurna muuqato.

ان عين الحب عمياء

Love is blind.

— Sida kalee loo yidhaahaa waa «kaljaceyl waa indha la'yahay, sida ay ku noqoteyna, ruuxaad kaljacayl u leedahay ama aad ku kalsoon tahay hadduu ceeb leeyahay amaba laga sheego kuumana muuqato, dheгна uma yeelalatid, waa sida lax dhukani col iyo abaarba moog»

188. Nimaad kabtiisa toleysid oo kafantaada tolaaya.

أريد حياتها وتريد قتلى

Show me a liar and I will show you a thief.

— Waa ruux aad wanaagiisa waddo oo xumaantaada ku maqan. Waa ruux aad u sama faleysa oo abaalkadhac aad ka dareemeyso, waa ruux aad si cad wax u tuseysa oo si qallooc ah wax u qaadanaya kolkaa, kaas oo kale waxa aydin kala tihiin kaaf iyo kala dheeri.

189. Nimaan dulqaadasho lahayn, waa geel aan horweyn laheyn.

الصبر مفتاح الفرج •  
Everything comes to him who waits.

— Dulqaadasho waa shay qaaya weyn inuu ruuxu sabur la yimaaddo oo wax kastoo dhaca aanu markiiba (seef la-duul ku noqon), waa tii Eebbe rususha qaarkood uu dulqaadasho ku tijaabiyey sidii Nebi Ayuub oo kale.

190. Nimaan rabbaayad qaadan : rabbigii ma garto.

لولا الربى لما عزمت ربي  
Children are what you make them.

— Rabbaayaddu wax Allaale iyo wixii sankuneefla ahba, waa ku qumman tahay. Dadkuna gaar ahaan sideedaba wuu u leeyahay. Ruuxna, haddaanu rabbaayad qaadan dadnimadiisu waa mid kala dhiman ama dheh, kala dhantaallan.

191. Nimaan ku aqooni, kuma temmedo.

من لايعرفك لايعربك قدرك •  
He who does not know you, does not value you.

— Tani waa sadddexshu : Laakiin. ruuxa Soomaaliyeed kolkuu ruux kale si dhab ah u barto, temmiddaad ka sokow, ruuxa iyo qaayahiisa midna ma illaawo, meelaha ku habboonna wuu ka xusaa oo qaayahiisa ayuu ku soo qaadaa oo wax ka sheegaa.

192. Nimaan nixini kalgaceyl ma geysto.

من لم يعطف لم يحب •  
Pity is akin to love.

— Oodhaah kale oo falsafad ahina waxa ay tahay, «Eebbe ma naxee waa naxariistaa».

193. Nimaan waxa jooga garani waxa soo soeda ma garto.

من لا يعرف الحاضر لا يعرف المستقبل

Study the past if you would divine the future.

- Cilmiga Taariikhduna, ula jeeddooyinka loo dhigto waxaa ka mid ah siyaalaha loo garan karo waxyaalihii ummad kastaba u horreeyey, waa iyadoo waqtiga kolba jooga laga tixraaco. Halganka nolosha cusub ee Soomaaliyeed waxa ay tusaale u tahay halgannadii ummadda ee waaggii hore ee ku sinnaa jihaaddadii Imaam Axmed Gurey iyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo daraawiishtii tan iyo Kacaankii Oktoobar 1969.

194. Nimaan wax aqoon, qaanso gurgurkeed baa wax loo saaraa, nin wax yaqaannase, daaqsin geel baa wax loo marshaa.

وليس أخو علم كمن هو جاهل.

Learning makes the wise wiser, but the fool more foolish.

- Waqtiga haatanna, ruuxa aqoon iyo garasho la bido, aqoontiisu dhadhan iyo waxtar midna ma yeelato, haddaanu cid kale oo uga baahan aanu wax ka tarin, waana sida falsafadda Soomaaliyeed maanta ay tahay: Haddaanad aqoon baro, haddaad taqaanidna wax bar «mujtamaca nooli si uu wax u kala kororsado ayaa korodhsiimadu ku jirtaa.

195. Ninna, dabecaddii, lama doorin karo.

ان التخلق ياتي دونه الخلق .

Once thief, always thief.

- Inkastoo la moodo xikmaddan oo kale inaanay casrigal ahayn, haddana, waxa ay tilmaameysaa inay adag tahay si dabecadda uu ruuxu ku weynaado loo doorin karo. Guhaadduse, waa tan iyada barbaarinta lug ku leh yarantana, wax ka qabsami karaan.

196. Nin baahani dab kama beydho.

• والمضطر يركب الصعب .

A hungry stomach has no ears.

- Sidaa daraadeed, waa tan la yidhaaho, ruux baahan xan lagama qarsado waayo dhegaba uma laha, oo wax kabo ayuu intaa ku hamiyayaa.

197. Nin daad qaaday xunbo cuskay.

• كالمستجير من الرمضاء بالنار .

A drowning person clutches to the straw.

- Mazhmaahda kalee la mid ahi waa tan ah «rag kaa badani iyo biyo kaa badaniba waa ku hafiyaan». Waa sidaasoo, wixii ra'yi ah ee lagaaga bato waa la qaataa. Sida xeerka bulshada uu yahay.

198. Nin dal waayey, duunyo waa.

• حب الوطن من الايمان .

Patriotism is true faith.

- Sida la egsoon yahay dal wax ka qiima weyni ma jiro, sidaa daraadeed, ayay u tahay ruuxa dalkiisa u dhintaa, inuu ruux shahiida yahay, Waana sida loo yidhaaho : «kalgaceylka aad dalkaaga u heysaa waa iimaanka ka badh».

199. Nin doonaa dad wada qumman, dad la'aan buu mutaa.

• من طلب أخا بلا عيب ، بقى بلا أخ .

Find not, want to a friend without a fault.

- Dadku wax walba waa leeyihiin mid qumman, mid qalloocan, mid hannuunsan, mid habowsan iwm. Mujtamac kastana, waa iskujir, haddana, inta toosan ee waanaaggu uu u muuqdo ayaa badan, inta kalena goor kastaa ha noqotee waa kuwii dadweynaha tiigsada. Awrta isku xidhiidhsani midba kan ka horreeya tallaabadiisa oo keliya ma qaado ee wuu tiigsadaane, haba liitee. Waana sida loo yidhi : «Awrka dambe, awrka hore socodkiisuu leeyahay».

200. Nin durbaan qaatay, cilaag dalbay.

• من دق الباب لقي الجواب .

He that will eat the kernel must crack the nut.

- Kolkaad taariikhda hiddaha ee ciyaaraheenna dib u raacdid, durbaan la tumo si dadweynuhu uu ugu soo baxo waxaa u horreeyey kii Sheekh Baahilaawe iyo Jaal-lahiisi ka dambeeyey ee la odhan jiray Jilaal Xuseen, waana ninkii ay gabadha heeseysay ay ku tidhi : «Jabow Jiilaal Xuseenow, Jabow jiiftaada ka daayee»......

201. Nin ragi raadkiisu toosan.

خير سلاح المرء ما وقاه

A ragged coat may cover an honest person.

- Raadkiisa waxa ka dhigan eraygiisa ula jeeddadiisa, waxqabadkiisa iyo arrinkiisuba, intuba toosan, ayaa mucda hadalku uu u dhacayaa.

202. Nin ragi waa kii, kacaa kufa.

• يتعلم الانسان من الخطأ .

Failure teaches success.

- Hawl aad qabanaysid libteeda lays ma siiyo, waayo, hawshu marna waa toostaa marna waa barriiqataa, kolka ay hawshu kaa xumaato, oo kaa xumaato, waad toosisaa oo kolba ku noqotaa ilaa inta ay si dhab ah u toosto - sidaa-saa, waxbarashadu ku jirtaa, hawluhuna ku toosaan, kuna qabsoomaan.

203. Nin raga waa la dirtaa, waxse looma sheego.

ارسل حكيمًا ولا توصه (الليبيب يفهم بالاشارة)

A word to the wise is enough.

- Nin aqoon iyo garaadba la biday oo dad looga xushay inuu hawlo falo soona fuliyo waxaad u dacal saarto mooyec, faafaahis iyo tafatir kale uma baahdo. «Nin weyr wax looma tilmaamo». ayaa la yidhi.

204. Nin ragi walaal wuxuu ku dhaamo la waa.

لاحتقر من هو دونك «فلكل شيء مزيه»

Despise not your enemy.

- Murtida Soomaalidu murti ahaan ka sokow, waxa ay tilmaantaa oo kale, dadnimada uu mujtamac ku wada dhaqmo. Maahmaahdani waxa ay tilmaameysaa «ruux» xaq-dhawrka uu kaa mutaa, ugu yaraan, waa kolkaad walaal, jaalle iwm., ugu yeedho». Walaalnimada aad wanaag ku weydid, iswaal kuma hanatid, ayaa kaloo la yidhi.

205. Nin gu' kaa weyni, gu' baas kaa weyn.

حلب الدهر أشطره . . .

You can't teach an old dog new tricks.

- Ruuxa kaa weyni, garasho iyo garaad, talo iyo taakulo intaba oo ah waxyaallo loo baahan yahay, wuu kugu dhaamaa. Wax korodhsadkuna, waa lama huraan hagaaguna, wuxuu ku jiraa in la guto. Waana sida loo yidhi, «Hortaa jire wax weydii aad gadaashaa jire wax u sheegtide».

206. Nin qoyani, biyo iskama dhawro.

انا الغريق عما خوفى من البلل .

A rolling stone gathers no moss.

- Ruux ceebeysan ceebtu waxba lama aha haddii uu sii kuumbado . . . Xadiiskuna, wuxuu yidhaahaa, «Haddaad xayada ama xishoodka dhigto waxaad doontaba fal».

207. Ninkii seexdaa, sicii dibi dhalay.

نام عصام ، ساعة الرحيل .

It is never too late to mend.

- Weli sed buu qabaa haddaan dibigana laga qalan. Waa-na tan la yidhaaho, «nin lagu seexdow, ha seexan».

208. Nin kuu digey, kuma dilin.

• لا عذر لمن أُنذِر .

To be forewarned is to be forearmed.

- Ruuxa arrin kaaga digaa, talo laysa siiyo kaa lama ha dhin, haddaadse, digniinta wax ku qabsan weydo wixii arrinta kaa gaadhana adaa is yeelay. «Ruux kuu digey kuuma hambeyn». Ruuxaasi yaanu kuu digin oo, had-duu kula siro oo aad sirtii ku garatid, waxba sirowgiis ha ku dhegtaagine, waana sidii loo yidhi. «nin ku si'ay wax kuu sheeg».

209. Nin madax ahi ma lur yara.

• سيد القوم أشقاهم .

The Queen can do no harm.

- Sida aannu u lur yareynini waxa ay tahay dad inkastoo wax loo qabto lama wada raalligelin karo, wax kastoo qabsoomana dad cabasho ma waayo, waana tan la yidhi, hal ama arrin nin la toosani nin kale tuur la leh. Mid kale waxa la yidhi: «Dad nin u taliyey iyo nin tuugey ayaa yaqaan».

210. Nin isfaanshay, waa ri' isnuugtey.

• من مدح نفسه ، فقد هيبتة .

Self praise is self recommendation.

- Waxa ay sidaa ku noqotay waa tan la yidhi. «eray aan carrabkaaga ku waanoosaneyn yaa carrabka walaalkaa ku wanaagsan. Maahmaahda si kalena waa loo yidhaahaa, «Nin is faanshey fallaadh baa maqaan».

211. Ninna waddankiisa looma dhaamo.

• الوطن عزيز وان جار عليك .

There is no home like home.

- Oodhaahdan oo kale tifaftir sii ridan uma baahna, nin ogsoonina ogsoon, Ruuxna haddii ay ku qasabto in uu waddankiisa ka tacbiiro oo uu in badanba ka maqnaado, haddii aan shil helin, goor kastaba ha noqotee, waa kii ku soo noqda. Ciiddu yaab bey leedahay! Waana sida loo yidhi, «Wax la dhalay iyo dhul baa loo marti yahay» Waa labada keliya ee ku asturi kara.

212. Nin waliba wuxuu bartaa, waa baaskii.

• من شاب على شيء شاب عليه .

Manners make the man.

- Waa run in qofku intuu yar yahay waxa uu kolba ku barbaaro in uu kaddib ku kacaamo taniyo inta ay la ekaato. Waana sida loo yidhaahaa nimaan dhul soodkii ku deeqini, dhaqdhaqaaqii wax kuuma taro.

213. Nin weyn tag lama yidhaahee, wuxuu ku tagaa la tusaa.

• اللبيب يفهم بالاشارة .

A word to the wise is enough.

- Haddii aad ruuxa erayga sidiisaba ugala xishooneysid siyaala kale oo fudud ayaa loo tusi karaa. Ruuxaasuna haddii aanu ahayn kan la yidhaaho «Dheg weyn» waa garan karaa, illeyn, aqooni waa iudha mug-good e, nin weynina, wedkii waa yaqaan». Sidii horeba loo yidhi.



214. Nin weynoo hadal ka dhacay, waa geed qolofi ka dhacday.

عثرة اللسان أسوأ من عثرة الرجل.

Speaking without thinking is shooting without aim.

- Ruuxa weyni xishmad gaar ah ayuu mujtamaca Soomaaliyeed ku leeyahay, kolkaa, lagama filo, ruux duq ahi inuu hadal dhacdhac ahi si fudud uga dhaco, siiba had dii meel fagaare ama goob weyn oo loo wacay, la joogo. Ruux kastaba, hadalkiisa iyo oodhaahdiisu meel kastaba ha ahaatee, waa sida loo yidhi: «waa la da'».

215. Nin hunguri kaa qaadday. waa nin seefi kaa qaadday.

قاتل الله الشرة .

Wilful waste makes woeful want.

- Hunguri weynaantu tilmaan fiican oo ruuxa laga bixiyo ma aha. Maantana, ruuxa hunguri lagu sheegi karaa waa afmiinshaarka oo halamhalamtiisu ay tahay wax ha lagu dhiibo. Mujtamacana lagama waayo. dad hadalka sidiisaba u sanifa una rogroga, laakiin, kolka uu heer wax ku qaadasho leh uu gaadho, ayuu mujtamaca idil u daran yahay.

216. Waa reer ninna dhisayaa, ninna, duminayaa.

ما حيلتك ان كنت تبني وغيرك يهدم .

Man proposes. God disposes.

- Waxaa kaloo maanta la yidhaahaa, «Hilibkiis eune, nin hakraday dalkiisa».

217. Waa calaacashoo timo ka soo baxaan !!!

حتى يلج الجمل في سم الخياط •

Until mules have foals.

- Sida aanay u suurtoobeyn inaan meelaha calaacasha oo kale ahi ay timo ka soo baxaan, ayaa waxyaalaha aan suuragal ahayn (ma dhacdo) ay odhaahdani u dhacaysaa. Sheekh mufti ahi inuu kitaabkiisa dhigo oo madiidaan akhriyayaana uu odhan waayo, waa calaacashoo timo ka soo baxaan.

218. Waa awr heeryadiisii cunayao kale.

ناقة ألت رحلها بالنار •

It is a dirty bird that fouls its nest.

- Waxaa ulajeeddadu ay tahay, inaanay habbooneyn in ruuxna dadkiisa iyo dantiisa midna, dhibaato iyo waxyeello u geysto, ama ha yaraato ama ha weynaato. Ruuxii dantiisa, dadkiisa ama dalkiisa ku hoos noqdaana, wuxuu la mid yahay sidii loo yidhi: «Geel ninkii lahaa dhacayo lama dhicin karo».

Awr ninkii lahaa dabada htystana ma kaco.

wuxuu ruuxu geystaa si kastaba ha ahaatee, waxbuu ku leeyahay. waayo awrku hadduu heeryadiisa iska cuno garbabeel uun baa u dambeyn-danina waa tiila yidhi, «waa seeto, awrkana rarka laga deyn maayo, hawaarista wuu u dambeyn.

219. Waajib aad gudaray, waa qaan kaa hadhay.

لا شكر للواجب

Virtue is its own reward.

- Ruux waliba mas'uuliyad gaar ah ayaa mujtamaca uu ku nool yahay ka saaran - ruuxii waajibkiisa ka baxaa waa ruux xilkii ka dhacay - kan jiiamaa ama wax dibindaab-yeeyaase, xilkii weli wuu saaran yahay, sidii ruux qaani ku maqan tahay oo kale.

220. Wax rag kaa galay, rako kaa gale.

ولا يحل الامر الذي هو يوم

To look for a needle in a haystack.

221. Waxaad barataa waad u bahalyoodaa.

أطلب العلم من المهد الى اللحد .

What is learnt in the cradle lasts to the tomb.

— Waa run oo waa tan la yidhi : «waxaad yaraan ku barato waad u aydaa». Si le'egna, waxa la yidhaahdaa «waxaad barataaba waa baaskaa».

222. Waxaan kashaada qaboojinin, yaanay korkaaga dhaamin.

دع اللوم فان اللوم اغراء

It is no use crying over spilt milk.

— Waxaa loola jeedaa wax yar oon sakaaro ka biirsani, had-dii ay dhacaan inaan leyska dabaridin oon la calaacalin, sida kalee maahmaahda loo yidhaahaana waxa ay tahay «waxaan kashaada gaadhini, yaaney korkaaga dhaamin».

223. Waxaad heysataa wax kuu lama sinna.

اصرف ما في الحبيب ، يأتيك ما في الغيب .

Give and spend and God will send.

— Si kalena waa loo yidhaahaa, «kadabkaa waa wixii karreysahaaga dhaafa».

224. Waxaan ku cuninba waa la cunaa.

كل الصيد في جوف الفراء

All is fish that comes to the net.

225. Waxaanad falayn lama faalleeyo.

ان كنت لا تقدر فلا تقل يوما انا

If you can't bite don't show your teeth.

— Waana sidaa loo yidhi «hadal badan dan baa dhaanta». Dantuna waxey ku jirtaa in ruuxa uu hawl qabto oo muu jiyo, intuu hadalkeeda ama faalladeeda uu had iyo jeer wadi lahaa.

226. Waxay ili aragto yaa ilko gooyaan.

بعين ترانى يا جميل اراك .

What the eye does not admire, the heart does not desire.

— Waxa ay ishu qeyb u aragto oo ka bogato yaa wax qabasho leh sida badan, inta waxyaalo kale, leysku halleyn lahaa.

227. Wadiiqada yari, wadiiqada weyn yey kugu riddaa.

ومن قصد البحر ، استقل السواقيا .

Small beginnings makes great endings.

228. War jiraaba cakaaruu iman.

لكل نبا مستقر (الشهرجي قدام البيت)

For every prophecy there is a fixed time.

— War oo horeyba loo yidhi. nin aan loo diran baa sida, «kiisa runta ah» iyo kiisa beenta ahi si dhakhso ah ayey u kala baxaan, mana raagee, kii gondahaaga yimaadda weeye. Cakaarina waa dooxadey ku baxday: «Dooxada Cakaaruu ahaa kala didkeennii e».

229. War nimaan loo diran baa sida (dadna waa indho ku garasho).

وياتيك بالاخبار من لم تزود

Words are but winds but seeing is believing.

- Waana tan la yidhaaho, «dhagaxna meel dhaw buu ku dhacaa, warna meel dheer». Mid kale, mujtamac kasta waxa ku nool dad caan isaga noqda warka qaadistiisa, sanifkiisa uun, kuwaas oo laga digtoonaadaa isku dirkooda iyo warguriddooda waa sida loo yidhi. Kuu sheekeeye kaa sheekeeye lalama sheekeysto.

230. Waranka ninka kugu dhiftiyo kan kugu dhaqdhaqaajiya kee baa daran!

حرك لها حوارها تحن .

The tongue ever turns to the aching tooth.

- Waranka kan kugu dhaqdhaqaajiya wuxuu u daran yahay wuxuu ku badaa xanuun silic ah - waxaana sidaa ka dhigan ruuxa kula soo doonta xaal ama arrin aad soo qaadkeeda isdiidsineysid si aan dhibaato u dhalan — ruuxa namiimiyaha oo kale ahi, waa kan diradiraha waxa la yidhaaho ka shaqeeya oo kolba dhegta iyo uurka waxaad isdiidsiineysid kuugu rida si aad u hiyikacdid oo wax u geysatid.

231. Warankii kugu soo noqon doona lama rido.

من يسكن بيتا من الزجاج ، ينبغي الا يرمى بالحجارة .

Those who live in glass houses, should not throw stones.

- Waa wax aad ku ceebeysan tahay, cid kale laguma canbaareeyo. «Ceeb aad leedahay cid kale lagulama galgasho».

232. Waraabaha ka aamusan iyo kan ciya waa iyama.

نبح الكلاب لا يضر بالسحاب .

Barking dogs seldom bite.

Wixii kuu dhuuntaaba, haddaanad ka feejignaan waa ku khatalaan.

233. Waagii kuu beryaaba waayo leh.

لكل غد طعام .

Every dog has his day.

- Maalin kastaaba hawl gaar ah iyo wax qabasho gooniya ayey leedahay. Intaad hawsha maanta ka wahsan laheyd oo dib u sii dhigan laheyd, iska kalwi yaaney kugu badan oo sida dhacmaha isugu kaa korbixin.

234. Waqti kaa tegey tiigsimaad ma leh.

الوقت كالسيف — ان لم تقطعه يقطعك —

Time and tide wait for no man.

- Waqti kaa tegey waa cimri ku dhaafay. In waqtiga lala beretemana, waa shey lagama maarmaan ah. Wixii aad dib u sii dhigtaa waxyaalo kale ayey keenaan oo ka soo kor dhaca. Hawlaha siyaabaha qaarkood ee wahsadka, ragjiidka gacan-culayska ka mid yihiin loola kacaana waa hawlo waqtigoodna tegey. Waxaa sidaa ka dhigan, sa-laad nin qalleeyey siidaa. Ninkii waqtiga la dagaallamayeyna wuxuu yidhi, «Seyl tegayey, yaan sarac ka reeba-yey».

235. Waqti kaa lumaa murugguu reebaa.

الفرصة أن فلتت نهى غصة .

Stitch in time saves nine.

- Arrin aad kolkaaba wax ka qaban laheyd, markaad fududeysato ama kaba wahsato, kaddib, dhibaato ayey kuu keentaa, hawsha la dugsadaana kaba sii daran. Sidaa darteed, ayaa eray kalena uu yahay, kolka su'aashan oo kale ay timaaddo, dad yaa ugu liitta? Waa ma toshe ma tashiishe, ma tashade, sidii horeba loo yidhi.

236. Wixii dantaa yaal daad ha qaado.

ما مضى فات ، والمؤمل غيب .

Let bygones be bygones.

- Kolkaad dad heshiiskood dhex gasho oo aad ka codsatid in wixii horese leyska ijlaawo oo si wacan loo heshiyo ayaad tidhaahdaa, «wixii tegey tege ee daad ha qaado» haatan xaal cusub ha la galo, mid kalena, wixii dhacay iyagoon ka daba tag lahayn waxaa habboon in waxa mar-kaa jooga ama soo socda wax lagu qabsado sida loo yi-dhi, «tagtey dhaafoo timaado qabo».

237. Wixii caloosha kaaga jiraa carrabkaa kaa xada.

اللسان من خدم الفؤاد

What the heart thinks the tongue speaks.

- Wixii aan daacad laga ahayni isma qariyaan. Kolka ay hadal tahay, haddii aad is tidhaahdid waxaanad si daacad ah ka ahayn qari oo uurka ku hayso oo intaad kari kartid ka warwareeg, la arkee adoon ula kicin loo eraygii ama shaygii uu carrabka ka fakado waa sida loo yidhaahaa : «Waxaan daacad ahayni dabaday ka soo xumaadaan».

238. Wixii warkiisu ku deeqaa, araggiisuna ku deeqaa.

والاذن تعشق قبل العين احيانا .

Who will not hear must be made to feel.

- Waa sidaasoo, wixii «araggoodu ku qeeqo, yaa oontoodu-na ku deeqdaa «Waxaad markiiba ka fiigtidna kuma dheereysid» waa la yidhaahdaa.

239. Wiilyahow, sidaan kuugu lisay iigumaad hanbeyn.

هل جزاء الاحسن الا الاحسان .

Kindness begets kindness.

- Dadka guhaada fiican lehi haddii ay dadaalanna, iya-gu, kuwii samafalo aan sii deyn weeye, inkastoo ay dhac-do in mararka qaarkood lagu abaalka dhaco. Wiilkan-fiicanna aabbihii, wuxuu ku baraarujinayaa inaanu samafalka ka tegin. Isna inuu duqa wax u reebaa, meesha waa ku jirtey.

240. Habar fadhidaa legdini wax uga fudud.

ما أهون الحرب على النظارة .

Lookers on see most of the game.

- Maahmaahdu sida ay ku timid, waxa ay ahayd : habar aragtey wiilkeedii oo wiil kale la legdamaya ayaa tidhi. «waar wiilka tabaco ku mar oo sinsaaro hor dhig oo si daa ugu deg, intay hawaarsatey». Wiilkii oo mintid ah ayaa yeedhoo wuxuu yidhi, «Illeyn habar fadhida, legdini wax uga fudud».

241. Haddaad istidhaahid been sheeg, been run u eg sheeg.

ان كنت كذوبا فكن ذكورا .

If you want to lie, make it as true.

- Iyadoo la ogsoon yahay inaan beentu raad lahayn oo goor ay noqotaba soo shaac baxdo, haddana tan maldahani, waa sii daran tahay. Maahmaahdanina waa saddexshub.



242. Haddaan la kala roonaan roob ma da'o.

إذا عز أخوك فهن .

- If the mountain does not come to Mohamed, Mohamed Has to go the mountain.
- Kumuu ahaa ninkii yidhi, «haddii aniga iyo dadka tin yari, oo xaal ahi, waaba wax kalee, na dhex maro kolna, tinkaasi ma go'een-waayo, kolkii la weydiyeyna wuxuu yidhi, «markay giijiyaanna waan debcin, markay tinkaas debciyaana waan giijin. Waa Seyidna Mucaawiye. Kolka dadku isfahmo, isu dul qaato oo si wadajir ahna laysu gargaaro oo wax la wada qabsado, ayaa ka dib «wanaaggu» uu bulshada u dhashaa, guul wacanna lagu gaadhaa; ma haddii kalaa, wax kale kuma aad gara-tid e, waa sidii Raage Ugaas u yidhi, «Wallee ama rafiigdoosidii raxad walaalooba» ama idin rash tidhi bow-dadaan lagu rukuucaynin».

243. Hadal badan dan baa dhaanta.

فضل الفعل على العقل مكرمة .

Action speaks louder than words.

- Waqtigan oo kalena waxa jideysan, «hadal yar iyo hawl badan.» Waayo- waa tii la yidhi, hadal badani koob ma buuxsho». Hawl kasta oo hareeraha laga joogana waa tii si wacan u qabsanta, una toosta.

244. Hadal intuu uurkaaga ku jiruu ammaanadaa yahay.

صدرك أوسع لسرك .

No cat out of the bag.

- Waa run oo kol hadduu wax kastaba ha ahaadee hadal fakado wuu fidaa oo faafaa sidaa baana loo yidhaahaa. «Eray af dhaafay afaaf dhaaf».

245. Hadalka dhabta ah kaftan baa kaa keena.

ربما مزحت الرجل فأحقدته .

There is many a true word spoken in jest.

- Waxaa dhacda in mararka qaarkood, hadal uu ruux qari-naayo uu kaga soo dhaco sidii kaftan, ruuxii kalena waa intuu doonayey e, uu eraygii la boodo - waana sida loo yidhaahaa, «erayga carrabkaa kaa xaday.» Sida kalena waxa loo yidhaahaa «dheriga karka kulleyl baa kaa keenay».

246. Haddii degdeggsiiyo door dhalaan, kaadsiiyana, kiish lacagay dhallaan.

في العجلة الندامة وفي التأني السلامة

Haste haste has no blessing.

- Degdeg iyo fudeyd midna faa'iido lagama helo, lagamana sugo. Ruuxna kuma tisqaado labadaa tilmaamood. Waxaad miyir ku weydid, miyir la'aan kuma hanatid.

247. Haddii geeriyi ku deyn lahayd, gabow baan ku daayeen.

إذا نجوت القدر فهلا تنجو الهرم .

As a man lives so shall he die.

Hebel waa gaboobay, waa duqoobay, waa fadhiistay ereyada ceynkaas ah kaftanka ka ilaali, waayo-gabow dad baa ka naxa kolka ay kaftanka taagan tahay.

284. Hadduu ruux seexdoo soo tooso, waa kii uun.

حاوى أن علت أو وطئت هي هي

A wise man changes his mind some times, a fool never.

- Sida uu kii uun u yahay ayaa gabowna wax kastaad is-merisid, cuntid, cabtid aannu wax kaaga doorinayn. sabatabax, ma dhaqna.

249. Hadduu magacu kaa xumaado. maal qabeen wax kuuma taro.

من مات ضميره ضاع صيته.

A good conscience is a soft pilow.

- Kolka uu ruuxa damiirku uu ka dhinto, waanu is-ogeyn e' ayaa magaciisuna ka dhintaa Waana kolka la leeyahay, «hebel dhegtii waa dhimatay».

250. Harag shabeel u huwo.

ليس له جلد النمر (الارتم)

A wolf in sheep's colthss.

- Waa ruuxa, ruux kale si isyeelyeela oo uu isleeyahay lagugu garan maayo ula yimaadda. Arrin kasta, si aan hugeeda ahayn, uma huwatid.

251. Hal aan weli kuu dhallin, ilmaheeda ha tirsan.

قبل الرماء تملأ الكنائن (قبل الصلاة يتم الوضوء).

Do not count your chickens before they are hatched.

- Waa sidii loo yidhi, shabeel aanad weli dilin, haraggiisa lama iibiyo. Waxaad markaas heysataa ayaa hanti la hubo oo waxtar ah kuu ah waxna aad ku qabsan kartaa - «quud aanse jirin, qoryo looma gurto» ayaa la yidhi.

252. Hal maqaarka diideysaa, daldalool bey ka eegtaa.

عذر أقبح من الذنب

Bad excusses are worse than none.

- Ruux xaajo aan laga fileyn diidayaa, geed uu ugu gabbaado ma waayo. Sida, marka la weydiiyo ruux qaangaadh ah wuxuu la tukan waayey - wuxuu yidhaahaa oo kale : «hawl baa i cusleysay, waana ilowshiiyo badanahay. Cudurdaarka ceynkaas ahina waa sida ay «Arraweelo u tidhi, maantana far baan maydhayaa hay fadhiyo geelu». Maahmaahdan sida kalee loo yidhaahaana waa «Hal god-lasho diideysaa, geed ey ku xogato ma weydo».

253. Hawl iyo Hantiwadaag, weys bahaystaan.

الإشترائية أساس العمل .

Labour is honour and life too.

- Mabda'a Hantiwadaaggu, wuxuu iska iecyahay dhaqdhaqaaq iyo hiyi kac gaar ah oo dadka ku dhaqani ay sharaaf iyo nolol aan dhalanteed aheyn ku gaadhaan. Hawl kasta oo hareeraha laga joogaa, si kasta awood iyo ta mari ha noqotee, waxaa ay kaa furataa hawl lagu maamulo deeq Shisheeye uu gacan kugu siiyo, kaddibna uu kuugu mann'a sheegto.

254. Haani, guntay ka tolantaa.

الاساس أس النجاح

The fountain is clearest at its source.

- Sheygaan aasaaska laga soo dhisini kor uma socon karo, xaajo kastoo wax ka qabasho lihi, horraanta ayey ku habboon tahay in laga abbaaro. Haddiise aad arrin dusha kaga timaadid waxa ay tahay: Xaajo nimaan ogeyni, indhuhuu ka ridaa.

255. Hebel tan xun; bey ugu baxdaa.

يصيد في ماء عكر .

He is fishing in troubled water.

- Waa sida ninkii gabyay u yidhi, abdikayba meel lagu jabaan jiqillo weynaaye «Dad baa had iyo jeer jecel in ay ka faa'iideystaan dadka isqabta, dad nabadi dhex taal oo ay dab dhex dhigaan; dhibahaasna, waa kuwuu isticmaarku waa' hore ku shaqeyn jirey. Malahmalahda ceeynkaas ah ayaa dad meherad ka dhigtaan. Dhinaca siyaa-sadda duugowdayna «waa qeybi, aad xukuntide».

256. Hebel culeys buu nagu hayaa.

فلان أثقل من رضوى

He is a wet blanket.

- Ulajeeddadu ma aha culeyska miisaanka, se, waxa loola jeedaa ruuxa yimaadda ama ka tegi waaya meel aan laga rabin ama lagu rabin. horena waxaa loo yidhi. «waxaan ku sarayn oo ku cusleyn lafa rag baa jira.»

257. Hebel aad baratid e, Jid ma la martay, jabad ma la gashay, jediin ma la cuntay.

سيرة المرء تنشىء عن سريرته

Never trust a man or women, until you know the worse of them.

- Ruuxa aanad intaa iyo waxyaalo la mid ah la soo marin, barashadiisa wax baa kaaga dhiman.

258. Hilib geel lagama dhergo se, waa laga qaraaraa.

واللحم المكر يسأم

Too much of one thing is good for nothing.

- Ruux kasta, hilib geel wax kama sheegi karo, laakiin ruux cunay muddo badan oo uu hunguri u ahaa, ayaa wax ka sheegi kara, muruqa labasuullena waa ka sii xag jiraa.

259. Hodan iyo sahoor subax hay wada guuraan.

غنى النفس أفضل عن غنى المال

The millionaries and the beggar each have 24 hours a day.

- Waa ninkii ay ceesaantiisii ay ceel keentay oo kale waa murti mabda' adkeynaysa, akideysana.

260. Horseed, hagar kuma maqna.

ان الرائد لا يكتذب أهله

The early bird catches the worm.

- Waa run oo, reerna, sahan la'aan ma guuro, colna, ilaalo la'aan ma duulo.

261. Hoo baa hoo keenta.

انما الناس بالمعاملات

Exchange is no robbery.

- Haddiise ay arrintu tahay qaatee qaado, ahna mid daw-daro ku dhisan, waa sidii ay heestu ku timid, «isweydiini ma xumee isweydaaris baa daran».

262. Hooyo waa «hadi» kol ay habar indha la' ku tahayna.

الام مقلّة العين

A woman's work is never finished.

- Hawl hooyo da' kastaba ha ahaatee, meel kastaba ha ahaatee. tii dhamaata kolna, ma aha - waayo - hooyo waa «beer» oo kale, beerna farahaba lagama qaado, haddii ay taab buura ah keento iyo haddii kaleba. Beerna ruuxii wax ka arkay uun baa garanaya. Hooyo hawsheed ma dhammaato.

263. Yaab ninkii rabaa ha yaabo, yaaqna, yaambo, kaama goyso.

وان تعجب فعجب..

- Yaaqu waa geed weyn oo jiriddiisu ay aad u weyn tahay. toox aadana ay leedahay. Mid kale, maahmaahaa xa-rafka «y»da ka kacaa ma badna, intooda yarina, yaab bey leeyihiin.

264. Yaa Xamar-weyne arkaan xaarin.

- Ku daridda erayga «weyn» halkan waa lagama maarmaan si aan eraygu u dhadhan beelin. Xamar ma aha magac keliya ee magaalada madaxda loo yaqaan, se waa magac faras oo qeyb u tilmaaman. Waxa kaloo taas ka dhigan, «Yaan Xiifiniin arkaan xiiqi qaban waayin». Xiiqdaaba la qaatee, aan cagaha wax ka dayi waayin ayuu eraygu u dhacayaa.

---

---

SOO RITEE SOO RIDO

---

---

# TUSMADA

Bog.

- Abeeso farta loo taagey. fanaxay u booddey.  
Abeeso yaaney dhul u eki kugu dilin.  
Arrad waa dan, usgagse waa doqonnimo. 1
- Af been u bartay, waa u bahal yoobaa.  
Aqoondarro laga roon.  
Aqoon la'aani, waa iftiin la'aan.  
Aqoontu iftiinka miyaa ! » 2
- Aqooni arag kama horreyso.  
Aqoon waa indhamuggood.  
Alif kuu hagaagaa, Albaqruu ku gaadhsiiyaa.  
Alla wateen wehel **ii** doono. » 3
- All (oon) waaga waraabe cunin.  
Awrka dambe, awrka hore socodkiisuu leeyahay.  
Ayaanle waa eedeysan yahay.  
Ismoog dhuuggii bey asleysaa. » 4
- Ishii aragtey burur.  
Ninba waa kol e, mus ma kula koray!  
Il ibtileysan yaa belaayo tilmaanta.  
Ilko wadajir bey wax ku gooyaan. » 5
- Intaad qalaysay anna waan qayilaayay.  
Intaanad falin ka fiirso.  
Iimaan waa uur muggii. » 6
- Oodi ab ka dhaw.  
Oodo dhacmeed sidey u kala sarreeyaan baa loo  
kala guraa.  
Oodi qaadis iyo jiidis weysla guryo geyn.  
I jiid aan ku jiidde waa gacmadaalis. L -



- Iskaashinimo waa habka Hantiwadaagga.  
 Uli waa qabowdaa, eray xumise ma qaboobo.  
 Uurkiisiyo afkiisu isma laha. » 8
- Barasho horteed, ha innicin.  
 Barasho yari, waa bil saddexaad.  
 Baqtiwareen waa xaaraan.  
 Ballandarro waa diindarro. » 9
- Ballan habeennimo, kaakac arooryuu leeyaahy.  
 Berberi wax faraaq lagu qaato ka weyn.  
 Belaayo ka hortag, mooyee, ka dabatag ma leh. » 10
- Belaayo kaa sii jeedda, layskuma soo jeedsho.  
 Belaayo salgan baa ka horreeya.  
 Belaayo, waa tii ka qoslisa.  
 Belaayo intey kaa maqan tahay, qayrkaa bey ku  
 maqan tahay. » 11
- Beenaale markhaatigiisuu fogeeyaa.  
 Bil saddexaad, beeshaana waa kaa kaxeysaa, beel  
 kalena kuma gaadhsiiso.  
 Biyo meel godan, bey isugu tagaan.  
 Bohol haddimo ha qodin, haddaad qoddidna ha  
 dheerayn ku dhici doontee mooyee.  
 Talo adaa ku noole, iyadu kuguma noola » 12
- Talo, isuma kaa sheegto.  
 Tiigaadi, daw kama baxsana.  
 Tuhun waa sed.  
 Jaallahaa Jaallihii waa Jaallahaa. » 13
- Jaallahaa kuma jebiyo.  
 Xaaq lama duudsiyo.  
 Xaajo nimaan ogeyni, indhuhuu ka ridaa.  
 Xaajo aan la rogrogin rag baan helin.  
 Keydha jecli, beerka jecli kala daa. » 14
- Xikmaddu waa baadi ruuxa muuminkaa ka maqan.  
 Xikmadi ruux waalanna kama maqna.  
 Xikmad la'aan caqligu wuu caabuqaa.  
 Khaayin afkuu kugu dhunkado, yuu kugu qaniinaa. » 15

Dabkii baxayaa dab lagu qabsadaa.		
Dad, dad baa loogu gabbadaa, dugaagna geed.		
Dadku waw daawe, saddexda dhuunigal (dabka, daaqa, daangeliska).	»	16
Dawaco meeshey macal ku dhadhamiso, yey mac- luul ugu dhinataa.		
Dagaal waa gelin danbe.		
Damal walba in gubtaa, waa hoostaal.	»	17
Dameeri dhaan raacday.		
Dameertu geela ha didisee, bururuf bey sii leedahay.		
Dantaa lagumana dheelo, lagamana dheeraado.	»	18
Dani kuuma been sheegto.		
Dani waa seeto.		
Daad la'aan doox ma soo rogmado.		
Daad intaanu ku soo gaadhin baa leyska moosaa.		
Daad intaanu ku soo gaadhin baa leyska moosaa.	»	19
Deg-deg laga roon.		
Deyro hore deeq kama dhacdo.		
Dib u dhacaa qoonsimaad buu leeyahay.		
Diqsi biyo ku dabbaal bartay, fuud buu ku gubtaa.		
Diiday hore kuma xishee, yey diiday danbe ku xilin.	»	20
Doqon ka hadli isagaa isdiliye.		
Doqonnimo daawo ma leh.		
Dundumo dheeraataa, dhulkay ku soo noqotaa.		
Dundumooyinka lala hadlaa, damac ma yeeshaan e.	»	21
Ragba waa ku raggeeda.		
Ruux aan sal lahaynin, sedkii laallan.		
Ruux aan geeri iyo nolol midna lahayn.		
Ruux wliba tuu caashaqaa waw Cambaro Dhoole.		
Ruux waliba wuxuu hooyadii la yahay hal madheedha.		
Ruuxu ma Cigaal Shidaad baa!		
Ruuxba dhiishuu ruxduu canaheeda dhamaa.		
Ruuxba wuxuu dhiteystuu, sharcigu dhaanso yi- dhaahdaa.	»	23

Ruuxna siduu isu yaqaan maahee, waa sida loo  
yaqaan

Runtu ma faantaa!

Runi rag waa ka nixisaa, waxse ma yeesho.

Riyoba, lugtoodaa shalow u soo jiidda.

Salaad nin qalleeyey sii daa

» 24

Salaad walba waqtigeedaa la tukadaa.

Samafale, sedkii ma lumo.

Samataliye sedkii waa janno.

Samo lama wada leysan karo.

Sirow ma hodmo, sakhaawena me deeqo

» 25

Shabeel aanad dilin, haraggii lama iibiyo.

Sharku yaryareysi ma leh.

Shir looma wada uunsiyo.

Shimbir waliba, shimbirkiisuu la duulaa

» 26

Shimbiri laba geed kama wada berdeysato.

Shimbiri mar bey dab qaadday, markiina min

Alley gubtey

Dhacdee miyaad leefi!

Dhagar-qabe dhulkaa u dhaqdhaqaaqa

» 27

Dhahar yidhi, Alle yidhi.

Dheri la kor taagan yahay ma karo.

Dheriga uumiga waxa ka keenay waa kuleylka

Dheg haddii la gooyo, daloolkaa hadha.

Dhegeyso, afkaaga caano geel lagu qabay'e

» 28

Dhubuq-dhubuqsi hore, dhabanna heys danbey

leedahay.

Dhul lagu indha la'yahay haddaad tagto, indha-

haa leyska ridaa

» 29

Dhuuma-dhuumeysi dhabarku muuqdaa dhuu-

meysi ma aha

Cadar xaqaa ceel kaama furto.

Cadawga isagaa noolow, ama cadowgaa u noolow

» 30

Caqligii fayooobi, jidh fayow buu leeyahay. Canaan la'aan carruuri ma korto. Cayaar la'aan caqligu wuu caabuqaa	»	31
Caado la gooyaa cadho Alley leedahay. Ceyl aanad ka biyo gaadheyn lama qodo. Cidna uma maqna, ceelna uma qodna. Gari laba nin kama wada qosliso Gari Ilaah bey taqaan. Garawshiiyo waa geel-siin. Grow iidaankii waa gaajo	»	32
Gacantaadoo dhudhub gashaa, laguma soo dhiftee, waa laga dhirindhiiriyaa		
Gaashaanqaad ma anbado. Geedjoog, gartii wuu yaqaan. Geed laga dhacay, gacmo lalama gaadho. Geeridu kolbey nolosha dhaantaa	»	34
Geesa lo'aad kuleylkaa lagu gooyaa. Geesi, kol buu dhintaa, fuleyna kun jeer. Geel geel weydaartay geeda la'aan baa leh. Geel, fudeydna kuma rimo, fudeydna kuma dhalo. Geela, duqdiisii durdurisay, aarankiisana maxaad moosday.	»	35
Gobanimo la hantiyey laguna dheelo. Goof madhan malab shiniyeed kama gurtid. Guriga ma gadine, jaarkiis baan gadayaa.	»	36
Far keliya fool ma dhaqdo. Faras dheereeyaba gorros ku dar. Fari Togdheer bey kula xushaa. Fadhi iyo fuud yicibeed leysku waa.	»	37
Falkooni waa feejignaana. Fiqi tolkii kama Janno tago. Fuley habartii ma gablanto.	»	38

- Fuullimaad waa fara ku hayn.  
 Qacda hore layga tegyaa, qacday yeedhay.  
 Qeedhiin iyo biseyl wixii ka dhexeeyaa waa yacya-  
 cood. » 39
- Qosol badani, qoonsimaad buu leeyahay. » 39
- Qofku waa meel madhan.  
 Qun-yar socde qodaxi ma muddo.  
 Quud aan jirin qoryo haw guran.  
 Kab xume ma hadhee, kab laawaa hadha.  
 Ka door, ka dar, bey dhashaa. » 40
- Karti laawe, deg-deg buu doorbidaa.  
 Kal baxnow kariinkaaba kuma kadee !  
 Kolka weylaa la helaa, lo'da la maalaa.  
 Kuu sheekeeye, kaa sheekeeye, lalama sheekeysto.  
 Kuuduudsani, keyd ma dhasho. » 41
- Laba daran mid dooro.  
 Lax dhukani col iyo abaarba moog.  
 Lama huraan waa cawska jiilaal.  
 Libaax nimaan aqoon yaa hilbo ka rita. » 42
- Lugtu hadday jeeniga dhaafto wey jabtaa.  
 Madaxaaga iyo manjahaaga toona lagama boodo.  
 Mar i dage Alle ha dago, mar labaad i dagase anaa  
 dagan. » 43
- Marti badan iyo baryo badanba waa leysku nacaa. » 43
- Maroodigu takarta ku joogta ma alkee, tan kan  
 kale ku joogtuu arkaa.  
 Maantana far baan meydhayaa, hay fadhiyo geelu.  
 Maangaab, meel ka dhac waa leeyahay, meel u  
 dhacse, ma laha  
 Maangaab, maalkii iyo maalintiiba laallan. » 44

Midha berde duuduubkaa lagu leqaa. Midho geed saaran, midho guntiga kuugu jira loo- ma daadsho, Murtida waa hodantinimo, odhaahdeedna waa deeq.	»	45
Muruqa laba suulle, ninba si ku ah.	»	45
Musuqmaasuq waa malahmalah meheraddii. Mukulaal minankeeda joogtaa, mici libaax bey leedahay.	»	46
Nabadi, waa sahaydaadood suxul ku sidataa.	»	46
Nabadgelyo la'aan lama ledo. Nabar doogi ma hadho. Nabsi bil ha jiro, boqolse ha jiro, ishaa baalkeeda ka dhow.	»	47
Naaska walaalkay taabtay kolba waa sidaan ka dhigtaa.	»	47
Ninka meeshii bugta isagey belbeshaa. Ninba wuxuu doonuu garaadkiisa leeyahay. Nimaad jeceshahay ceebtiisu kuuma muuqato. Nimaad kabtiisa toleysid oo kafantaada tolaaya.	»	48
Nimaan dulqaadasho lahayni, waa geel aan hor- weyn lahayn. Nimaan rabbaayad qaadan, rabbigii ma garto. Nimaan ku aqooni, kuma temmedo. Nimaan nixini kalgaceyl ma geysto.	»	49
Nimaan waxa jooga garani, waxa soo socda ma garto.	»	50
Nimaan wax aqoon, qaanso gurgurkeed baa wax loo saaraa, nin wax yaqaanse, daaqsin geel baa wax loo marshaa.	»	50
Ninna dabecaddii lama doorin karo.	»	50
Nin baahani, dab kama beydho. Nin daad qaaday, xumbo cuskay. Nin dal waayey, duunyo waa. Nin doonaa dad wada qumman, dad la'aan buu mutaa	»	51

- Nin durbaan qaatay cilaag dalbay.  
 Nin raga raadkiisu toosan.  
 Nin raga waa kii kacakufa.  
 Nin raga waa la dirtaa, waxse, looma sheego. » 52
- Nin raga walaal wuxuu ku dhaamo la waa.  
 Nin gu' kaa weyni, gu' baas kaa weyn.  
 Nin qoyani, biyo iskama dhawro.  
 Ninkii seexdaa, sicii dibi dhalay. » 53
- Nin kuu digey, kuma dilin.  
 Nin isfaanshay, waa ri' isnuugtey. » 54
- Ninna waddankiisa looma dhaamo.  
 Ninba wuxuu bartaa waa baaskii.  
 Nin weyn tag lama yidhaahdo, wuxuu ku tagaase,  
 la tusaa » 55
- Nin weynoo hadal ka dhacay, waa geed qolofi  
 ka dhacday  
 Nin hunguri kaa qaaday, waa nin seefi kaa  
 qaaday
- Waa reer ninna dhisayaa, ninna duminayaa » 56
- Waa calaacashoo timo ka soo baxeen.  
 Waa awr heeryadiisa cunayoo kale.  
 Waajib aad gudaday, waa qaan kaa hadhay » 57
- Wax rag kaa galay, rako kaa gale.  
 Waxaad barataa waad u boholyowdaa.  
 Waxaan kashaada qaboojin, yaanay korkaaga  
 dhaammin.  
 Waxaad heysataa wax kuu lama sinna » 58
- Waxaan ku cuninba waa la cunaa.  
 Waxaanad falayn lama faalleeyo.  
 Waxay ili aragto, yaa ilka gooyaan.  
 Wadiiqada yari, wadiiqada weyn, yey kugu riddaa  
 War jiraaba cakaarruu iman. » 59

- War nimaan loo diran baa sida (dadna waa indho  
ku garasho). » 60
- Waranka ninka kugu dhiftiyo, kan kugu dhaqdha-  
qaajiya kee baa daran!
- Warankii kugu soo noqon doona lama rido » 60
- Waraabaha ka aamusan iyo kan ciyaya waa  
iyama!
- Waa'gii kuu beryaaba, waayo leh.  
Waqti kaa tegey tiigsimaad ma leh.  
Waqti kaa lumaa, muruguu reebaa » 61
- Wixii daantaa yaal, daad ha qaado.  
Wixii caloosha kaaga jira, carrabkaa kaa xada  
Wixii warkiisu ku deeqaa, araggiisu ku deeqaa » 62
- Wiilyahow, sidan kuugu lisay, iigumaad han-  
beyn
- Habar fadhida legdini wax uga fudud.
- Haddaad istidhaahid been sheeg been run u eg  
sheeg » 63
- Haddaan la kala roonaan roob ma da'o.  
Hadal badan, dan baa dhaanta.  
Hadal intuu uurkaaga ku jiruu, amaanadaa yahay. » 64
- Hadalka dhabta ah, kaftan baa kaa keena.  
Haddii degdegsiiyo door dhalaan, kaadsiiyana,  
kiish lacagay dhalaan  
Haddii geeriyi ku deyn lahayd, gabow baan ku  
daayeen
- Hadduu ruux seexdoo soo tooso, waa kii uun » 65
- Hadduu magacu kaa xumaado, maalqabeen wax  
kuuma taro
- Harag shabeel u huwo.  
Hal aan weli kuu dhalin, ilmaheeda ha tirsan.  
Hal maqaarkeeda diideysaa, daldalool bey ka  
eegtaa. » 66



Hawl iyo hantiwadaag weys baheystaan Haani, guntey ka tolantaa Hebel tan xun bey ugu baxdaa	»	67
Hebel culeys buu naga hayaa Hebel aad baratid e, jid ma la martay Jabad ma la gashay, jediinse ma la cuntay. Hilib geel lagama dhergo, waase laga qaraartaa. Hodan iyo sabool, subax bay wada guuraan	»	68
Horseed, hagar kuma maqna Hoo baa hoo keenta Hooyo waa hadi, kol ay habar indha la' tahayna. Yaab ninkii rabaa ha yaabo, yaaqna, yaambo kaa goyso	»	69
Yaa Xamarweyne arkaan xaarin Yaan Xamarweyne arkaan xiiqi qaban waayin.	»	70

# OGSOONOW

Xikmaddu waa baadi aqoonta ka maqan.

Hadal aan maahmaah laheyne waa :

hibib aan mindi laheyn,

ama

Xeedo aan afaarneyn,

ama

Soor aan dux laheyn,

Soor waxa halkan loola jeedaa wixii cunto **ah.**

---

---

*Waxaa lagu Daabacay*  
**WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA**

---

---

